

Renting in Seattle

BUUG GACMEEDKA KIRAYSTAHA



Seattle Department of
Construction & Inspections

JANAAYO 2024

HA HILMAAMIN INAAD IS
DIIWAANGELISO SI AAD U


CODAYSO!

CODKAAGU WAA MUHIIM!

www.kingcounty.gov/depts/elections

KUSOO DHAWOOW GURIGGA!

waxaa jira waxyaabo badan oo la sameeyo marka loo guuraayo guri cusub. Cusboonaysiinta codbixiyahaaga diiwaangelintu waa mid kamid ah hawlaha ugu muhiimsan ee u baahan inaad xasuusnaato.



HORAY MA U DIIWAAN GASHANAYD?

Kuwaan waa 5 qaab oo fudud aad ku cusbooneysiin karto ciwaankaaga:

- Haddii aad heysato shatiga hadda gawaarida Washington State ama aqoonsiga Gobolka, kuboqo oonlen!
- Boostada kusoo dir foomka diiwaan gelinta oo uu la socdo Buug Gacmeedkaan Kiraystuha.
- Fariin ugu dir iimaylka elections@kingcounty.gov magacaaga, taariikhda dhalashada, deegaankaaga iyo ciwaanka boostadaada hore iyo deegaankaaga iyo ciwaanka boostadaada cusub.
- Wac 206-296-VOTE (8683). Adeegyadu waxaa lagu heli karaa 120 luuqadood.
- Si shaqsi ah u aad xarunta King County Election ee ku taal Renton ama Voter Registration Annex Seattle.




**XASUUSNOW IN AAD
BADASHO
CIWAANKA GOOBTA AAD
DEGENTAHAY UGU
YARAAN 29
MAALMOOD KAHOR
MAALINKA CODAYNTA.
EEG JADWALKA
CODBIXIYAHA.**

MA RABTAA INAAD IS DIIWAAN GELISO?

Waxaa jira 3 nooc aad isku diiwaangelin karto si aad u codaysno:

- Haddii aad heysato shatiga hadda gawaarida Gobolka Washington ama Aqoonsiga Gobolka aan dhicin, booqo oonleenka!
- Boostada kusoo dir foomka diiwaan gelinta oo ku jira Buug Gacmeedkaan Kiraystuhu. (Arag ka bixida xarunta.)
- Si shaqsi ah u aad xarunta King County Election ee ku taal Renton ama Voter Registration Annex Seattle.



Soo dhawoow!



Waa maxay Buug Gacmeedka Kiraystaha?

Kusoo dhawoow Renting in Seattle (Guri Ka kiraysiga gudaha Seattle). Mulkiilaha gurigaaga ayaa laga doonayaa inuu ku siiyo Buug gacmeedka kireystaha marka ugu horraysa ee aad saxiixdo heshiiska kirada. Nuqulada elektorronigga ah waxaa loo ogolyahay in kirada loo cusboonaysiiyo, kiraysteyaasha sannadleyaasha ah kuwa bilaha ah iyo mar kasta oo ay Magaaladu soo daabacdo noocyo cusub.

Buug Gacmeedka Kiraystaha ayaa ku siinaaya dulmar balaaran oo ku aadan labadaba xaquuqdaada kiraystaha iyo waajibaadka ka saaran wuxuuna ku siinayaa tilmaamo iyo ilo muhiim ah oo kaaga dhigaaya guri ka kiraysiga Seattle mid xiiso leh oo aad xog ka hayso. Ku hayso buug gacmeedkaan meel aad si fudud uga tixraaci karto.

Eeg websetkeena www.seattle.gov/rentinginseattle wuxuu bixinayaa shuruucda nidaamka kiraysiga iyo shuruucda guryaha ee cadaaladda ah, kuwaas oo loogu tala galay kiraysteyaasha iyo bixiyeyaasha guriyaynta, si gaar ah ka faa'iidayste kasta.

Marka aad u baahato macluumaad ama hagitaan dheeraad ah wac Khadka caawimaadda (206) 684-5700 Isniinta – Jimcaha inta lagu jiro saacadaha shaqada. Turjumaad teleefoonka ah ayaa la heli karaa

Seattle waa Magaalo Soo dhaweyn leh taasoo qiimaysa wadanoolaanshaha iyo sinaanta. Shaqaalaha magaaladu dadka mawaydiyaan sharcigooda muwaadinimada waxayna ushaqeeyaan dhammaan dadka dagan magaalada ayadoon loo fiirinaynin inay soogalooti yihiin iyo inkale.

Ugu danbayntii, buug gacmeedkaan looguma talagalin inuu noqdo talo bixin sharci laakiin wuxuu kaa caawinayaa fahamka xeerarka guryaha ee Magaalada.


Kiraysi Wacan!

daabacaaddii 3^{aad}



Seattle Department of
Construction & Inspections

Tusmada Mawduucyada



HELISTA GURI	6
Isdiiwaangalinta Kirada	8
Heerarka Ugu hooseeya	9
Helitaanka Guryaha ee Cadaaladda ah	11
Qaybaha La ilaaliyo	13
DIYAAR U AH KIRO	14
Baarista Kiraystaha	14
Codsiga First In Time	16
Saami isu dhiganka Kirada iyo dakhliga	17
Xayawaanka Dadka u adeega	18
SOO DAGISTA	21
Liiska hubinta Soo dagista	21
Heshiiska Kirada	22
Kharashka Soo dagista	23
Akoonada Adeegyada	26
MARKA AAD KIRAYSANAYSO	30
Waajibaadka Mulkiilaha dhulka/Kiraystaha	32
Keenista dad cusub oo Qolka kula daga	34
Ogaysiiska Mulkiilaha dhulka	36
Balanqaadyada Kaalmada Kirada	43
KA GUURIDDA GURIGA	44
Xeerka Guri ka saarista Sababta wata	46
Difaaca Guri ka saarista	49
Qafaalashada Sharci darrada ah	50
Carbuunta Damaanadda ah	51
Fikradaha kama danbaysta ah	52
Ilaha Kiraystaha	54
Tusmada	55
Qoraalada	58

HELITAANKA GURI

Helitaanka goob sax kuu ah maaha saynis quman dadkuna waxay guryahooda ku helaan qaabab badan oo kala duwan. Liis badan ayaa lagu heli karaa oonleenka ayagoo bilaash ah. Mararka qaar, gaari ku wadista ama ku lugaynta aaga xaafad ayaa kuu keeni karta natiijada helitaanka meelaha astaamaha "waa kiro" lagusoo dhajiyay. Iska ilaali tuugada oonleenka ee kaa codsanaaya lacag ama inaad akoon ugu shubto lacag. Marna ha aqbalin inaad meel kiraysato adoon arkin. Haddii heshiiska kuula muuqdo mid aad uga fog xaqiiqada, waa suurtagal inuu sidaan yahay! Waad soo sheegi kartaa tuugada kirada adoo ku wargelinaaya Federal Trade Commission oo aad ka helayso www.consumer.ftc.gov.

Guryo la awoodi karo waxa ay ka dhignaan kartaa waxyaabo badan oo kala duwan. Si guud, waa guryo ku xiran heerka dakhligaaga, badanaana, maaha mar kasta, ayadoo ku xiran aagga kirada. Guryaha raqiiska ah qaarkood waa kuwo federaalku maal geliyo iyo/ama ay bixiyaan ururada guryaha khayriga ah. City's Office of Housing (Xaafiiska Guryaha ee Magaaladu) wuxuu hayaa liiska guryo qiimo jaban, ka raadi liiska halkaan www.seattle.gov/housing/renters/find-housing.

Badanaa waxaa jira liiska sugitaanka ee dookhyadaas guryaha qiimaha jaban. Seattle Housing Authority (SHA, Maamulka Guryaha ee Seattle) ayaa leh guryaha dadka danyarta ah iyo barnaamijka kaalmada kirada labadaba oo loo yaqaano "Housing Choice Vouchers (Boonoyinka Dookha Guriyaynta)". Waxaad xog dheeraad ah oo ku saabsan SHA ka haysaa barta www.seattlehousing.org, ama booqo xafiiskooda oo ku yaala bartamaha Seattle 190 Queen Anne Avenue North. Waxaad wici kartaa Laynka Xogta Bulshada oo ah 2-1-1 si aad u hesho liiska shirkadaha guryaha raqiiska ah ee taleefanka lagu heli karo haddii aadan ka geli karin kumbuyuutarkā.





DIWAAN GELINTA KIRADA

Ilaa iyo 2014, *Seattle Rental Registration Inspection Ordinance (RRIO, Xeerka Korjoogtaynta Diiwaangalinta Kirada ee Seattle)* wuxuu dhammaan guryaha kirada ah farayaa inay iska diiwaangaliyaan Dowladda hoose. Waxaa jira waxyaabo shardiga laga soo reebay oo ay kamid yihiin guryaha qofka iska leh uu dagan yahay ee qololka iska kireeya, hantida guryaha ah ee ay leedahay Seattle Housing Authority (Wakaaladda Guryaha ee Seattle) ama goobaha shatiyada haysta sida guryaha ay dagan yihiin dadka baahiyaha gaarka ah qaba. Guryaha kale ee kirada qofka mulkiilaha ah degenyahay ee ayagana shardiga laga reebay halkaan hoose ayay ku qoran yihiin.

Mulkiileyaasha guryaha waxaa laga doonayaa inay ayagu cadeeyaan in guriga ay kiraynayaan uu buuxiyay shuruudaha lagama maarmaanka u ah in la dago ee ku cad liiska macluumaadka isdiiwaangalinta. Waxaa muhiimadda la siinayaa u hogaansamidda caafimaadka iyo badbaadada. Waxaa loo baahan yahay in la hubiyo 5-10kii sanno waxaana dhammaystiraya kormeeraha Dowladda hoose ama kormeere guryaha qaabilsan oo gaar ah oo ay Dowladda hoose ogolaatay. Soo cusboonaysiinta diiwaangalinta waxaa la iskaga baahan yahay labadii sanno ba mar.

Waxaad ciwaanka guriga kirada ah ka raadin kartaa www.seattle.gov/rrio si aad u aragto inuu diiwaangashan yahay iyo in kale. Haddii uusan diiwaangashanayn waxaa ka dhalan kara ganaaxyo waxayna saamaynaysaa awoodda mulkiilaha dhulku ku bixin karo ogaysiiska guri ka saarista.

Waxyaabaha loo daayay Guryaha Mulkiiluhu degenyahay



Guud ahaan, mulkiileyaasha gurigooda la wadaagaya kiraysteyaasha ama la dagan hal guri sida adu/dadu (qaybta guriga ku dhagan/ka durugsan) waxaa laga daayay qaar kamid ah shuruudaha iyo nidaamyada kirada iyo cadaaladda.

Xaaladaha qaar ayaa saamayn kara shuruudaha laga daynayo sida adeegsiga shirkad qaabilsan maaraynta guryaha ama helista ogaysiiska ku xadgudubka xeerarka guryaha.

La soco kala duwanaanshaha si aad u gaarto go'aan sax ah. Waxa ugu muhiimsan ee ay tahay inaad ogaato, ayaa ah in mulkiileyaasha gurigooda dagan ay haystaan awood ay ogaysiiska joojinta kiraysiga bil-laha ah ku bixin karaan 20 maalmood kahor inta aan guriga lagaa saarin ama inaysan kuu cusboonaysiin kiraysiga.

Si aad u hesho xog intaan dheer, eeg shuruudaha soo socota ee wadata waxyaabaha laga daynayo guryaha ay daganyihiin mulkiileyaashii iska lahaa:

- Guryaha Fursada loo Siman yahay bogga. 11- 12, 17-18
- First in time – bogga.16
- Kharashaadka soo guurista – bogga. 24-25
- Ku darista dad cusub qolka – bogga. 34-35
- Guri ka saarida sababta macquulka ah leh bogga. 46-48
- Difaaca Guri ka saarista – bogga. 49

Heerarka ugu Hooseeya

Waa muhiim inaad ogaato waxa ay tahay inaad ku raadiso guriga aad dagi doonto marka lagasoo tago dookhyadaada shaqsiga ah. Seattle waxay leedahay xeerarka heerka ugu hooseeya ee badbaadada iyo ilaalinta guryaha kirada ah ee Housing and Building Maintenance Code (Xeerka Ilaalinta Guryaha iyo Dhismaha ee Magaalada). Kuwa soo socda waa sharaxaad kooban oo ku aadan heerarkaas.

Booska Dagista guriga

Qaybtaan waxaa ku jira xajmiyada ugu yar ee guryaha waxaana ku jira qaybaha qolalka la seexanaayo. Waxaa sidoo kale ku jira shuruudaha nalka iyo hawada, sida daaqaadaha, marwaxadaha, iyo nadaafada. Tusaale, qolka jifku waa inuu noqdaa ugu yaraan 70 iskuweer fiid uuna lahaado 50 iskuweer fiid dheeraad ah oo uu seexan karo qof kasta oo dheeraad ku ah labo.

Qaab dhismeedka

Waxyaabaha sida aasaaska, tuubada qiiqa bixisa, iyo saqafku waa inay noqdaan kuwo adag oo dhagan. Dhismuhu waa inuu iska difaacaa kuleelka iyo qaboowga, uusan boorku soo gelin, ka dhawrsan yahay cayayaanka, waana in si wanaagsana loo dhawraa dayactirkiisa.

Farsamada

Dhammaan guryaha la dago waa inay lahaadaan kululeeye oo ku rakiban (agabka hawada kululeeya kaliya kuma filna). Qalabka korontada, ayna ku jiraan fiilada, iyo agabka korontadu waa inay noqdaan kuwo si wanaagsan loo rakibay qaab amaan ahna lagu hayo. Gurigu waa inuu leeyahay nal ammaan ah uuna leeyahay baraysyada korontada oo ku filan.



Dabka iyo Badqabka

Jaranjarooyinka waa in si ammaan ah loo dhisa ayna lahaadaan xakabadaha la qabsado oo wanaagsan. Qalabka qiiqa iyo Carbon ka sheega ayaa qasab ah. Albaabka banaanka ama daaqad si wacan loo balaariyay oo looga baxo xaaladaha degdega ah (oo loo yaqaano egress) ayaa qasab ah in lagu xiro dhammaan qolalka la seexo. Waxaa jira shuruudo badan oo dheeraad ah oo lagu xiro guryaha waawayn, ee qaybaha badan.

Ammaanka

Albaabada guriga laga galo waa inay leeyihiin kuuro lagu xiro waana inay lahaadaan duleel ama daaqad si aad u aragto qofka albaabka taagan. Qufulada waa in la badelaa marka dadka guriga kiraysta isbadelaan. Dhismuhu waa inuu leeyahay ammaan ku filan si looga hortago fal danbiyeedyada loo gaysto dadka guriga dagan iyo alaabtooda.



Waa wax fiican in la ogaado!

Waxyaabaha kale ee badqabka la xariira ee ay tahay inaad la socoto markaad dagayso dabaqyada duqoobay iyo guryaha ayaa ah khataraha ka imaan kara riinjiga maarta ee jeexmaaya iyo maadooyinka maarta marka soo dataan (ay jajabaan aana la xakamayn). Haddii gurigu leeyahay qolal ka hooseeya dhulka sida qolalka salka hoose, May leeyihiin daaqo balaaran oo ku filan ama albaabada banaanka ah? Haddii aysan lahayn, qolalkaas waa inaan la xayiisiin loona adeegsan qolal jiif ahaan, maadaama aysan buuxin shuruudaha badqabka.



Guriyayn Caddaalad ah oo Dadkoo dhan Usimanyihiin

Sharciyada Fair Housing ee Seattle ayaa loo sameeyay inay xaqiijiyaan in qof kasta uu si siman u heli karo guriyaynta. Waxaad haysataa difaac fara badan oo ka dhan ah takoorka xaataa kahor inta aadan go'aansan saxiixidda kirada. Waxyaabahaan waxaa kamid ah isha dakhliga; taariikhda danbiga, xayaysiiska gaarka ah/daba galista kirayste imaan lahaa iyo sidoo kale xaquuqaha naafanimada ee helitaanka hoy/wax ka badalid macquul ah.

Waa sharci daro in shirkadaha guriyayntu ay, si kas ah ama kama' ah, inay qoomiyado gaar ah siiyaan ama u diidaan liiska dadka kiraystayaasha ah. Liis dhahaaya 'wuxuu ku habboon yahay lamaane aan buuq lahayn' waa mid takoor keenaaya waayo waxay u muuqataa inuu dadka codsadaayaasha ah ka reebaayo ayadoo lagu salaynaayo 'xaalada waalidnimada,' tusaale.

Mulkiilayaasha guryuhu waa inay ku daraan xog gaar ah marka ay xayeysiinayaan guri kiro ah. Xayeysiintu waa inay:

- Waxaa kamid ah nidaam loo istimaali doono baaritaanka iyo heerarka ugu hooseeya si horey loogu sii socdo hanaanka codsiga.
- Wuxuu qeexayaadhammaan macluumaadka iyo dukumiintiyada mulkiilaha dhulku u adeegsan doono baaritaanka.
- Waa inay bixisaa xog sharaxaysa sida aad u codsan karto waqti dheeraad ah si aad u buuxiso codsiga waxyaabaha sida turjumaan ama boos kugu filan naafo awgeed.

Difaacyada isha dakhliga

Seattle waxay leedahay difaacyo loo sameeyay dadka kiraystayaasha ah oo leh isha dakhliga oon ahayn shaqada. Shirkadaha guryuhu kuuma diidi karaan guri kiro ah ama kuulama dhaqmi karaan si dadka kale ka duwan sabab la xariirta in dakhligaagu ka yimaado social security, alimony, hawlgab, naafo iwm. ama haddii aad ku tiirsan tahay barnaamijka kaalmada kirada sida Housing Choice Voucher (Boonooyinka Dookha Guriyaynta). Haddii mulkiilaha gurigaagu leeyahay shardiga isku eegista dakhliga iyo lacagta kirada waa inuu ka jaraa lacag kasta oo kaalmaati ah oo aad hesho kahor intuuusan samayn xisaabaadka. Arag bogga. 17 si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku aadan isku eegista dakhliga iyo lacagta kirada.

Fair Chance Housing

Xeerka Fair Chance Housing ee Seattle ayaa bixinaysa difaac looga hortagaayo eexda iyo caqabadaha ay waajahaan dadka danbiyada soo maray markay isku dayaan inay helaan guri kiro ah.

Xayeysiinta guri kiro ah laguma mamnuuci karo dadka danbiyada soo maray.

Codsadayaasha dadka waawayn ah ayaa laga baari karaa diiwaanka dadka tacadiyada galmada gaystay. Mulkiile guri ayaa codsade ku jira diiwaanka u diidi kara guriga kaliya haddii:

1. Qofku danbiga galay asagoo qof wayn ah.
2. Sabab ganacsi oo sharci ah ay jirto. Waxaa loo baahnaan doonaa wada xiriir si loo sameeyo siyaasadda/nidaamka iyo badqabka dadka deegaanka/dhismaha u dhexeysa.

Kuwa soo socda waa qaar kamid ah sababaha faahfaahinaaya fikirka mulkiilaha guriga:

- Nooca iyo darnaanta danbiga
- Tirada iyo noocyada xukunada lagu riday
- Da'da uu jiray markii danbiga lagu xukumay
- Caddeynta taariikhda kiraystaha wanaagsan
- Waqtiga laga joogo taariikhdiis danbiga lagu xukumay
- Xog taageeraysa



Mulkiileyaasha guryaha ay u kiraysanyihiin qaybaha guriga kamidka ah halkaas oo ay ku noolyihiin abaatmantiyo isku dhagan ama barxad ayaa laga daayay shuruudahaan baaritaanka. eeg bogga. 8.

Haddii aad aragto guri kiro ah oo xayeysiinaaya oo aan waafaqsanayn sharciyada Fair Chance housing, waxaad wici kartaa laynka caawimaada oo ah (206) 684-5700 si aad usoo sheegto.



Qaybaha La ilaaliyo

Shuruucda Fair Housing ee Seattle ayaa loo sameeyay inay xaqiijiyaan in qof kasta uu si siman u heli karo guriyaynta wxaaana lagu saleeyay qaybaha la ilaaliyo.

- Isirka
- Midabka
- Asalka
- Jinsiga
- Naafada
- Caqiiqadada
- Diinta
- Da'da
- Aargoosi
- Ilaha kale ee dakhliga
- Wadanka aad u dhalatay
- Faraca
- Xaaladaada guur
- Fikir siyaasadeed
- Xaalada waalidnimo
- Dookha galmada
- Aqoonsiga jinsiga
- Adeegsiga xayawaanka dadka u adeegga
- Adeegsiga Boonada Dookha Guryaha ama barnaamijyada kale ee kaalmada
- Xaalada ciidanimu ama halyeey ciidanka ka tirsanaan jiray
- Taariikhda danbiyada
- Dhalashada iyo heerka socdaalka
- Natiijada uurka



DIYAAR U AH KIRO

Kiraysiga ayaa noqon kara ganacsi tartan loogu jiro, gaar ahaan guryaha qiimaha jaban. Inaad xili hore diyaar garoowdo ayaa ku caawinaysa.

- Baro heerkaaga daynta iyo cilado kasta oo suurtagal ah oo kasoo muuqan kara warbixinta baaritaanka. Waxaad maarayn kartaa xogtaas intaad dirayso codsigaaga waxaadna sharxi kartaa xaaladaha jira si aad u taageerto codsigaaga. Hadda waxaad ka heli kartaa warbixintaada daynta barta www.annualcreditreport.com
- Baro xaquuqdaada kahor inta aadan codsi gudbin.
- Diyaarso xogta soo socota si aad codsiga u dirsato:
 - Ciwaanka gurigaaga hadda iyo kii hore ayna ku jirto xogta mulkiilaha guriga
 - Magacyada iyo taariikhaha dhalashada dhammaan dadka guriga ku nool
 - Xaqiijinta Xogta shaqada iyo dakhliga
 - Xogta gaadiidka
 - Tixraacyada, kuwa shaqsiga ah iyo kuwa guriyeynta quseeya
 - Xogta xayawaanka rabaayada ah

Baarista Kiraystaha

Shirkadaha guriyeyntu waa inay ku caddeeyaan mar hore shuruuda ay u adeegsan doonaan baarista codsigaaga iyo sababta keenaysa in la diido codsigaaga. Waxaad xaq u leedahay koobiga warbixinta baaritaanka.

Waxaa kaliya lagaa qaadi karaa qiimaha dhabta ah ee baaritaanka codsiga. Qiimaha caadiga ah ee Seattle waa ku dhawaad \$25-\$45 qof kasta oo wayn.

Haddii codsigaaga la diido, shirkada guriyeyntu waa inay ku siisaa ogaysiis qoran oo sheegaya sababaha. Kan waxaa loogu yeeraa ogaysiiska 'adverse action (tallaabada ciqaabta)' waxaana qasab ka dhigaaya sharciga Magaalada iyo Kan Gobalka labadaba.



Haysashada Damaanada

Markaad codsato in guri lagaa kireeyo, shirkada guriga ayaa laga yaabaa inay kaa qaado lacag damaanad ah si laguugu hayo guri inta la baaraayo codsigaaga.

Lacagta ugu badan ee damaanada ah oo mulkiilaha gurigu kaa qaadi karo waa 25% kirada bisha Risiid sharaxaaya shuruudaha waa in lagu siiyaa.

Haddii guriga lagu siiyo aadna go'aansato inaadnadaagin, inta badan lacagta carbuunta ah way kaa dhimanaysaa. Lacagta damaanada ah oo buuxda ayaa laguusoo celinayaa haddii codsigaagu guulaysan waayo ama gurigu ku fashilmo kormeerka guryaha oo uu sameeyay barnaamij kaabid siya guryaha kirada ah.

Haddii aad saxiixdo heshiiska kiraysiga guriga, lacagta carbuunta ah waa inaad la bixisaa kirada bisha koowaad ama kharashaadka soo dagista (carbuunta damaanadda ah iyo tan xayawaanka rabaayadda ah).





First-in-Time Application (Codsiga Soo kala Horaynta)

First-in-Time Ordinance (Xeerka Soo kala Horeynta) ayaa ka doonaaya mulkiilaha guriga inuu heshiiska kirada siiyo codsadhaha koowaad ee u qalma kaasoo soo gudbiya codsi buuxa. Shirkadaha guryaha bixiya waa inay si buuxda ula shaqeeyaan codsadyaasha ayagoo adeegsanaaya lacagta kaalmaynta guryaha sida buuxinta dukumiintiyada loo baahan yahay, iwm.

Mulkiilaha gurigu waa inuu:

- Taariikhda iyo waqtiga ku qoraa codsiyada siday usoo kalahoreeyeen
- Waa inuu u baaraa codsiyada siday u kala horeeyeen midba mar
- Waa inuu siiyaa codsadyaasha ugu yaraan 72 saacadood oo ay ku keenaan wixii xog dheeraad ah oo loogu baahan yahay codsi haddii kale dhamaystirnaan lahaa
- Waa inuu siiyaa 48 saacadood oo uu jawaab uga bixinaayo yabooha heshiiska kirada kadib waqtiga uu mulkiiluhu sii wadi karo baarista codsadhaha xiga ee laynka ku jira



Isku Fiirinta Rent Ratio

Mulkiilaha gurigu kuuma diidi karo guriga sabab la xariirta in dakhligaagu ka yimaado meel ama meelo aan ahayn shaqo. Haddii qayb kamid ah shardiga u qalmida uu yahay isku fiirinta kirada iyo dakhliga kusoo gala, dakhligaaguna ka yimaado meelo kale ama kaalmooyin, mulkiilaha gurigaagu waa inuu raaca tallaabooyinka marka uu xisaab samaynaayo:

TALAABADA 1 AAD

Go'aami kiraystaha wadarta dakhliga bishii adigoo ku daraya dhammaan ilaha la xaqiijin karo ee dakhliga.

Bishiiba Dakhliga

Sooshal Sakuuratiga:
\$400

Gunnada Halka Mar ee
Halyeeyga: \$300

Taageerada
Carruurta: \$200

**Wadarta Guud
ee Dakhliga
Kiraystaha: \$900**

TALAABADA 2 AAD

Go'aami kiraystaha qayb kamid ah kirada ayadoo laga jaraayoo dhammaan ilaha kabka la xaqiijin karo laga helay kirada Bilaha ah

**Kirada:
\$1200**

Kaalmada Caawimaada
Ciidanka Hawlgabka ah:
\$1000

**Qaybta kirada
ee kiraystaha:
\$200**

TALAABADA 3 AAD


Xisaabinta kirada dakhliga loo baahan yahay ayada qaybta kireeyaha lagu dhufanayo saamigaaga. Go'aami u qalmidda adiga oo dakhliga guud ee kireeyaha ka jaraya dakhliga loo baahan yahay.

**Saamiga 3:1 ee
dakhliga kireystaha
loo baahan
yahay waa \$600**

Kaalmada Caawimaada
Ciidanka Hawlgabka ah:
\$1000

**Kireystaha ayaa
buuxinaya saamiga
3:1 ee Shuruuda
Dakhliga**

Xayawaanada dadka u adeegga



Xayawaanada dadka u adeegga si guud ayaa loo qeexaa gudaha Seattle waxaana ku jira taageerada dareenka, saaxiib, xayawaanada baxnaaninta, iyo kuwo kale. Xeerarka guriga ee caddaalada ah ayaa u baahan inay fursad siiyaan xayawaanada dadka u adeegga.

- Shirkada guriyayntu waxay codsan kartaa in la xaqiijiyi baahida la xariirta naafada ee aad u isticmaalayso xayawaanka rabaayada ah, ayna samaynayaan qolo saddexaad oo shaqada yaqaana sida bixiye caafimaad ama qof u qalma inuu xaqiijiyi xidhiidhka.
- Xayawaanada dadka u adeegga looma arkaayo xayawaanada rabaayada ah lagamana mamnuuci karo guryaha kirada ah. Xeerarka 'Maaha Rabaayad' ma quseeyaan xayawaanada dadka u adeegga.
- Tababarka ama shahaadada xayawaanka dadka u adeegga qasab maaha.
- Shirkada guryuhu kuma saari karto lacag damaanad ah, qarash, ama kiro dheeraad ah xayawaanka adeegga awgiis.
- Waxaad masuul ka tahay habdhaqanka xayawaankaaga adeegga iyo waxyeelo kasta oo uu u gaysto gurigaaga kirada ah iyo dhismaha guud.




Gelitaanka dhismaha

Gelitaanka dhismuhu waxay u sahlaysaa kiraystayaasha naafada ah inay si madax banaan u noolaadaan. Meelaha la cuskado, xakabadaha, balaca dheeraadka ah ee gaari curyaanada, aag baakin gaar ah ayaa ah qaar kamid ah tusaalayaasha. Haddii aad naafo tahay, waxaad codsan kartaa hooy macquul ah ama waxkabadalka.

Hawl fududayntu waa in la badelo xeerarka, sharciyada, farsamooyinka, ama adeegyada si laguugu sahlo inaad hesho fursad lamid ah dadka kale oo aad ku isticmaasho kuna raaxaysato gurigaaga kirada ah. Tusaalaha hawl fududayn macquul ah waa in lagaa dhaafo shardiga xeerka baakinka si qofka isticmaalaaya gaari curyaanku u helo meesha ugu dhaw gurigiisa.

Wax kabadalka guriga ee macquulka ah waxay kuu sahlaysaa inaad isbadelo jireed ku samayso dhismaha kuwaas oo muhiim u ah inaad guriga kirada ah ka dhigto mid la geli karo. Waxaad masuul ka tahay dhiibista qarashaadka isbadelada macquulka ah illaa mulkiiluhu helo maahee deeqda dawlada federaalka ah. Tusaalaha isbadal macquul ah ayaa ah inaad codsato oggolaansho lagu balaarinaayo albaabka musuqusha si aad ugu gasho gaari curyaanka wayn.

Haddii aad qabto su'aalo ama doonayso inaad cabasho gudbiso, la xariir Laynka (206) 684-5700.





KUSOOGUURIDA GURIGGA

Soo guuristu xili mashquul iyo walaac badan. Waxyaabaha ayaa kula fududaan kara. Waa muhiim inaad taxadarto aadna ka feejignaato faahfaahinta heerkaan maadaama ay billooy u tahay dhammaan kiradaada.

Liiska hawlaha Sooguurida

Tani waa qayb aad muhiim oo kamid ah heshiiskaaga kirada waayo waxay ku xiran tahay lacagtaada damaanada ammaanka.

- Waa inay si sax ah u qeexdo si faahfaahsan xaalada hadda ee gurigaaga cusub
- Ciladaha jira waa inaad si degdeg ah ugala hadashaa mulkiilaha gurigaaga si aadan u qaadan masuuliyada waxyeelada dhacday kahor inta aadan soo degin
- Waa inaad saxiixdaan taariikhdana ku qortaan adigga iyo mulkiilaha gurigaaga. Mulkiilaha gurigaagu waa inuu ku siiyaa koobi
- Liiskaan hubinta waxaa adeegsan doona mulkiilaha guriga marka la gaaro waqtigii aad ka guuri lahayd guriga si loo go'aansho inaad adiggu sababtay waxyeelada guriga

Waa sharci darro in la aruuriyo dhibaaji damaanad ah iyada oon lasaxiixin liiska hubinta xiliga guuritaanka.




Heshiiska Kirada ah



Hambalyo! Codsigaaga guriga kirada ah wuxuu ahaa mid guul ah waxaana hadda la joogaa xiligii aad saxiixi lahayd heshiiska kirada. Si adag u muraajicee kahor inta aadan saxiixin. Xasuusnoow, waa heshiis sharci ah.

- Isha kuhaay qarashaadka aad masuulka ka tahay ee dheeraadka ku ah kiradaada, sida adeegyada guriga, iyo sida biilkooda laguugusoo dirayo
- Qiimee xeerarka si taxadarleh si aad u xaqiijiso inaad fahmayso xeerarka ku gadaaman martida, xayawaanada rabaayada ah, baakinka, iwm.
- Raadso caawimaad ku aadan fahanka heshiiskaaga kirada haddii aad u baahan tahay, gaar ahaana haddii aan Ingiriisku ahayn luuqadaada koowaad

Buug-gacmeedkaan kiraystaha (nuqul daabacan) waa in lagu siiyaa wakhtiga aad saxiixdo heshiiska kiraynta ee hore. Nuqulo elelktoroonik ah ayaa lagu ogolyahay kaddib marka aad saxiixdo heshiiska kirada; mar kasta oo buug gacameedka wax laga badalo, ama sannadle ama kirada bil-laha ah.



Noocyada Heshiiska ee Kirada



Dhammaan heshiisyada kirada ee Seattle waxaa maamula *Just Cause Eviction Ordinance* (Xeerka Guri K asaarista Sababta Macquulka ah leh). Arintaanoo micnaheedu yahay in mulkiilaha dhulka ay waajib ku tahay inuu sabab sharci ama 'Just Cause' u haysto inuu ka baxo heshiiska kirada ee bil-laha ah ama uusan kuu cusboonaysiin marka wakhtigiisu dhamaado. Muddada ogaysiiska ee loo baahan yahay ayaa ku xiran sababta macquulka ah. Sababahaas iyo ogaysiiska laga doonaayo in mulkiiluhu bixiyo ayaa ku qoran bogga. 46

Heshiis Bille ah

Heshiiska noocaan ah ayaa lasoo cusboonaysiiyaa bil kasta. Waxaad ku baabi'in kartaa heshiiska kirada adoo bixinaaya ogeysiiska qoraalka ah ee ugu yaraan 20 maalmood kahor soo baxa dhammaadka muddada kirada bilaha ah. Tusaale, haddii aad doonayso inaad guurto Feebaraayo, mulkiilaha gurigaaga ayaa helaaya ogaysiiskaaga qoran ugu danbayn Feebaraayo 8. Waad ku farxi kartaa fududaynka muddadaan laakiin, iska ilaali in shuruudaha heshiiskaaga kirada, ayna ku jiraan cadadka kirada, ay isbadali karaan marka lagu keeno ogaysiiska saxda ah inta lagu jiro heshiiska kirada bilaha ah.

Muddada Kireynta

Nooca heshiiskan kiraynta ah waa muddo cayiman. Shuruudahu waxay ahaanayaan kuwo go'an ilaa inta heshiisku socdo haddii aan lagu beddelin heshiis u dhaxeeya adiga iyo mulkiilaha guriga. Mulkiilaha guriga waa in uu kugu siiyaa heshiiska kireynta guriga 60-90 maalmood kahor inta uusan dhicin heshiiskaaga hadda ilaa ay sabab u noqon waysay inay sidaas sameeyaan mooyee. Ka eeg Sababta macquulka ah bogga. 46

Fatrada kireynta koobaad ee loo badelaayo mid bile ah si toos ah

Tani waxaa ay dhacdaa marka kiradu ay ku bilaabato heshiis wakhti ah oo ay si toos ah ugu noqoto heshiis bil ilaa bil ah dhamaadka. Waxaad xaq u leedahay inaad sii daganaato marka muddada koowaad ee heshiiska illaa in mulkiiluhu haysto maahee sabab macquul ah oo uu kusoo afjaraayo heshiiska kirada.

Ma jiro Heshiiska Kirada ah?

Marna maaha fikir sax ah inaad u guurto guri kiro ah adoon haysan heshiis qoraal ah. Haddii aad gasho xaalad noocaas ah, waxaa lagu aqoonsanayaa kirayste bille ah ayadoo loo maraayo heshiis afka ah waxaadna haysataa xuquuqda kiraystaha. Hase yeeshee, qeexitaanka kirayste waa qof xaq u leh inuu daganaado guri kiro ah oo uu heshiis kiro ku dagan yahay. Inkastoo heshiisyada afka ah aysan sharci daro ahayn, way adkaan kartaa in la caddeeyo inaad tahay kirayste adoonhaysan heshiiska kirada haddii khilaaf dhasho.

Kharashka Soo Dagista

Gudaha Seattle, waxaa jira xadiyo adag oo ku xiran waxa aad qarashkooda dhiibayso markaad soo guurayso. Qarashaadka soo guurista waxaa ku jira lacagta damaanada ammaanka, qarashaadka, iyo lacagta damaanada xayawaanka rabaayada ah.

- Lacagaha carbuunta damaanada ah iyo qarashaadka oo layskudaray kama badan karaan lacagta kirada hal bil.
- Qarashaadka waxaa kaliya lagaaga qaadi karaa baaritaanka (hubinta shaqsiyadaada marka aad codsanayso kirada) iyo/ama nadaafada
- Haddii qarash lagaaga qaado nadiifinta xiliga billoowga heshiiska, markale lagaama qaadi karo lacagta nadiifinta markaad guurayso.
- Qarashka guud ee lagaa qaado waa inuusan kabadan 10% kirada hal bil
- Lacagta ugu badan ee aad ku dhiibayso damaanada xayawaanka rabaayada ah waa 25% kirada hal bil ayadoon laga eegayn cadadka xayawaanada rabaayada ah ee kuu joogta

Tusaalayaasha:

Tracy waa qof kaligeed iyo eey guriga ku nool yihiin. Kirada guriga ay u guurayso waa \$1200 oo guri afar qof loogu talagalay ah.



Mulkiilaha guriga ee Tracy waxa uu qaadi karaa:

- \$45 oo qarashka baaritaanka ah
- \$75 oo qarashka nadiifinta ah
- \$1080 Lacagta damaanada ah
- \$300 oo damaanada xayawaanka rabaayada ah

Wadarta guud ee lacagta Tracy uga baxaysa soo guurista ayaa u dhigmi karta illaa ugu badnaan \$1,500.

Hamid iyo Fatima oo ay lajiraan labadooda ilmood ayaa ah qoys ka kooban afar qof. Kirada ay bixiyaan waa \$2,200 bishiiba.



Mulkiilaha gurigeedu waxa uu qaadi karaa:

- \$90 ($\45×2) oo qarashka baaritaanka ah
- \$130 oo qarashka nadiifinta ah
- \$1980 Lacagta damaanada ah

Wadarta guud ee lacagta qoyska uga baxaysa soo guurista ayaa u dhigmi karta illaa ugu badnaan \$2,200.

Lacag-bixinada qeyb-qeybta loo bixiyo

Way adkaan kartaa in la dhiibo wax caadiyan u dhigma lacagta kirada saddex billood markaad guri cusub usoo guurayso. Gudaha Seattle, waxaad xaq u leedahay inaad dhiibto qarashaadkaaga soo guurista (damaanada iyo qarashka), kiradii bishii lasoo dhaafay, iyo lacagaha hormariska ah ee xayawaanka rabaayada ah.

Mulkiiluhu madiidi karo inuu guriga kaa kireeyo sababo la xariira inaad go'aansatay inaad adeegsato lacagta hormariska ah. Waa muhiim inaad xasuusnaato in marka lagu daro kiradaada bilaha ah, lacagta hormariska ah ay qasab tahay in la dhiibo waqtigeeda ama aad khatar u gasho inaad hesho Ogaysiiska Guur ama Lacagta Dhiib oo 14 maalmood ah. Jadwalka lacagta hormariska ah waxaa lagu saleeyaa muddada ay socotay kiradaadu.

Lacagaha Damaanada iyo Qarashaadka


- 30 maalmood - kirada lix billood = lacagaha hormariska ah oo afar ah oo isku mid ah oo joogto ah muddo isle'eg.
- Bille ah = laba lacagood oo hormaris ah oo isle'eg
- Ma jirto lacag damaanad ah/qarashaad ah haddii wadarta guud aysan ka badnayn 25% kirada hal bil
- Lacagta damaanada xayawaanka rabaayada ah = saddex lacagaha hormariska ah oo is le'eg

Kirada Bishii Lasoo Dhaafay

- Lix billood+kirada = lacagaha hormariska ah ee lix billood oo isle'eg, joogto ah, billana ah
- 60 maalmood - kirada lix billood = lacagaha hormariska ah oo afar ah muddo isle'eg.
- Ma jiraan qarashaad, ganaaxyo, dulsaaro lagu qaadi karo lacagaha hormariska ah
- Ku fashilanka dhiibista lacagaha hormariska ah sidii lagu heshiisay waa jabinta heshiiska kirada waxaadna ku heli kartaa Ogaysiiska 14 Maalmood ee Guur ama Dhiib qarashka.
- Taas badalkeed, adiga iyo mulkiilaha gurigaaga ayaa dagan kara jadwalka lacag bixinta oo aad ku heshiiseen labadiinu. Ka dhig mid qoraal ah



Koontooyinka Adeegga Guriga



Seattle City Light

Seattle City Light (SCL, Korontada Magaalada Seattle) waa waaxda Magaalada u qaabilsan koontooyinka korontada. Waxaad koonto ku furan kartaa magacaaga. Waxaad masuul ka tahay inaad u sheegto SCL marka aad guurayso. Ku fashilmida dhiibista qarashka adeegga guriga ama mulkiilaha guriga ayaa keeni karta ogaysiiska jarista adeegga oo ka soo baxa shirkada adeegga iyo/ama *14 Maalmood ee Ogaysiiska Bixi ama Bax* oo mulkiiluhu soo saaro.

TILMAAN:

SCL ayaa sidoo kale leh barnaamijyada qiimo dhimista iyo caawimaada qarash bixinta oo la siinaayo macaamiisha u qalanta. Ka bookho websaytkooda www.seattle.gov/light/assistance/ ama wac (206) 684-3000.



Seattle Public Utilities

Seattle Public Utilities (SPU, Adeegyada Guriga ee Dadwaynaha Seattle) waa Waaxda magaalada u qaabilsan koontooyinka biyaha, bulaacada, iyo qashinka. Lagasoo bilaabo sanadkii 2011, kiraystayaasha cusub ma furan karaan koontooyin ku qoran magacyadooda. Mulkiilaha ayaa masuul ka ah koonatada guud. Waxaad masuul ka noqon kartaa dhiibista qarashka lacagaha adeegyada guriga haddii ay ku qoran yihiin heshiiskaaga kirada. Waa in lagu siiyaa koobiga bilka rasmiga ah haddii mulkiiluhu toos u qaado. Ku fashilmida dhiibista bilkaaga waqtiga saxda ah ayaa keeni karta in lagu siiyo ogaysiiska jarista adeegyada iyo/ama *14 Maalmood ee Ogaysiiska Bixi ama Bax* ee uu soo saaro mulkiilaha gurigaaga maadaama qarashka adeegyada guriga loo maareeyo isla sida kirada guriga marka guri ka saarid timaado.

TILMAAN:

Haku falaashin wax aan ka ahayn xaashida musqusha wax la iskaga tiro. Iska ilaali inaad tuubada bulaacada raaciso timo, xayr, iyo waxyaabo balaaran. Gufada isku goysa tuubada bulaacadu waa mid qarash badan in la dayactiro mulkiilaha gurigaaga ayaana kaa qaadi kara qarashka guud haddii adigga ama qof kale oo goyskaaga ah uu wax aan ahayn xaashida musqusha ku falaasho tuubada. Ha aaminin sheegashooyinka suuqa ee ku aadan in suufafka wax lagu tiro "la falaashi karo", iwm.

Waa wax fiican in la ogaado!

SPU waxay leedahay barnaamijyo ka caawiya qiimo dhimista adeegyada guriga iyo caawimaada qarash bixinta lana siiyo macaamiisha u qalanta. Booqo www.seattle.gov/utilities ama wac (206) 684-3000.

TILMAAN:


Ku fashilmida dhiibista qarashka adeegga gurigaaga xiliga saxda ah waxay keeni kartaa in guriga lagaa saaro.

TILMAAN:

Ku fashilmida soo sheegida meelaha dilaaca, musqulaha biyuhu ka daadanayaan, iyo ciladaha kale ee adeegga oo aad u sheegayso mulkiilaha isla markaba ayaa ku saari kara masuuliyada qaar ama dhammaan qarashka.

TILMAAN:

Qashinka cuntada iyo waxyaabaha dib loo warshadayn karo looma oggola in qashinka lagu daro. Dhammaan dhismayaashu waa inay lahaadaan qasacyo u gaar ah agabkaas.



Puget Sound Energy

Puget Sound Energy (PSE) waa shirkad bixisa gaaska dabiiciga ah ee magaalada. Waxaad koonto ku furan kartaa magacaaga. PSE waxay haysaa xog ku jirta webseetkeeda taasoo ku saabsan barnaamijyada kaa caawinaaya biilalka, bookho www.pse.com ama wac 1(888) 225-5773.

Difaacyada Biilka Adeegga Guriga

The City's *Third Party Billing Ordinance* (Xeerka Biilalka ee Qolada Saddexaad ee Magaalada) ayaa difaacaaya kiraystayaasha siya mulkiilaha ama shirkad kale oo lacagaha qaada qarashka biyaha, wasakhda, qashinka, ama adeegyada korontada guryaha la degan yahay ee leh 3 ama ka badan oo guri. Haddii aadan helin xogta biilka ee saxda ah ama aad isleedahay waxaa lagaa qaaday qarash qaldan, waa inaad marka koobaad la hadashaa mulkiilaha gurigaaga ama shirkada biilka kaa qaadaysa.

Cabashooyinka jabinta heshiiska waxaa loo diraa:

**Office of the Hearing Examiner
Seattle Municipal Tower
700 5th Ave
Suite 4000
Seattle, WA 98104**

Waxaad kala xariiri kartaa baaraha lambarka dhagaysiga
(206) 684-0521 ama iimayl ku dir Hearing.Examiner@seattle.gov

Xog badan ka baro koodhka:

[http://www.seattle.gov/Documents/Departments/HearingExaminer/
ResidentialThirdPartyBillingQuestionsandAnswers.pdf](http://www.seattle.gov/Documents/Departments/HearingExaminer/ResidentialThirdPartyBillingQuestionsandAnswers.pdf)



Maxay tahay inay ku jiraan adeegyada guriga kiraystaha?

Guryaha kirada ah qaarkood, waxaad dhiibaysaa adeegyada guriga (sida biyaha) oo aad lacagtooda siinayso mulkiilaha guriga ama shirkada biilka, halkii aad toos ka siin lahayd shirkada adeegga. *Third Party Billing Ordinance* ee Magaalada ayaa difaacaaya kiraystayaasha siiya mulkiilaha ama shirkad kale oo lacagaha qaada qarashka biyaha, wasakhda, qashinka, ama adeegyada korontada guryaha la dagan yahay ee leh 3 ama ka badan oo guri.

Maxay tahay inay ku jiraan adeegyada guriga kiraystaha?

- Magaca, ciwaanka ganacsiga, iyo lambarka taleefanka ee mulkiilaha ama shirkada saddexaad ee biilka qaada, hadba kii biilka usoo dira kiraystaha
- Aasaaska qarashka kasta oo gaar ah, ayna ku jiraan qarashaadka adeegga iyo lacagta lasoo daahida qarashka, haddii ay jirto, oo ah sheey ku jira laynka, iyo wadarta guud ee biilka
- Haddii guryuhu yihiin kuwo mid kasta gaar cabir u leh (guri kasta iyo mitirkiisa gaarka ah), akhrisyada mitirka ee hadda iyo tii hore, taariikhda akhriska hadda, iyo cadadka la isticmaalay
- Taariikhda ay ku eg tahay lacag bixintu, taariikhda biilku noqday mid xiligiisii dhaafay, cadadka lacago kasta oo ganaaxa lasoo daahida ah ama ganaaxyo imaan kara, iyo taariikhda lacagaha ganaaxa lasoo daahida ah ama ganaacyada lagugusoo rogaayo
- Lacag kasta oo horay laguugu lahaa
- Magaca, ciwaanka boostada, iyo lambarka taleefanka lagusoo diraayo su'aalaha iyo khilaafaadka biilka, saacadaha shaqada iyo maalmaha la heli karo, iyo hanaanka loo adeegsaday xalinta khilaafaadka la xariira biilalka
- Marka biilka adeegyada guriga loosoo diraayo si gaar ah, mulkiilayaasha guryuhu waa inay: sharaxaad ka bixiyaan sida biilka loo xisaabiyo iyo meelaha badanaa loo qaybinaayo lacagta biilka adeegga guriga; waa inay u sheegaan dadka guryaha dagan isbadalada ku dhaca farsamooyinka biilka; ay koobi ka bixiyaan biilka adeegga guriga ee dhismaha ee ay heli karaan kiraystayaasha



Tusaalayaasha Guud ee Biilka Adeegga Guriga

Sida qarashaadka adeegyada gurigaaga loo qaado ayaa lagu sharaxayaa heshiiskaaga kirada. Halkaan waxaad ka helayaa dhawr qaab oo guud oo kiraystayaashu ku bixiyaan adeegyada guriga.

Kiraysiga guriga hal qoys oo leh koontooyinka gaas, koronto, iyo biyo/bulaacad/qashinka oo aan ku jirin kirada.

Korontada: Kiraystaha waxaa la siinayaa biil magaciisu ku yaalo, wuxuuna toos biilka u siinayaa SCL

Gaaska: Kiraystaha waxaa la siinayaa biil magaciisu ku yaalo, wuxuuna toos biilka u siinayaa PSE

Biyaha, Bulaacada, Qashinka: Biilka waxa uu ku qoran yahay magaca mulkiilaha guriga, laakiin koobi ka mid ah biilka ayaa loo dirayaa kiraystaha, kiraystaha ayaana qarashka biilka toos u siinaaya SPU



Guri ku yaala dabaq leh adeegyada guriga oo aan ku jirin kirada.

Korontada: Kiraystaha waxaa la siinayaa biil magaciisu ku yaalo, waxa uuna toos biilka u siinayaa SCL

Biyaha, Bulaacada, Qashinka: Shirkad saddexaad oo adeegga bixisa ayaa adeegsata xogta ku qoran biilka SPU ga ee dabaqa kadibna si siman ugu qaybisa qaybaha guryaha dabaqa ayadoo laga eegaayo tirada dadka ku jira heshiiska kirada. Kiraystaha ayaa dhiibaaya qaybtiisa biilka oo uu siinaayo shirkada sadexaad.



INTAAD KIRADA KU JIRTO

Adigga iyo mulkiilaha guriguba waxaad leedihiin xaquuq iyo waajibaad ayadoo ku xiran heshiiskiina kirada, sharciyada Magaalada iyo sharciga gobalka. Inta badan kuwaan waa waxyaabo caqliyan ah waxayna u baahan yihiin in dhammaan dhinacyadu u fuliyaan si niyad sami ku jirto. Waxaa intaas dheer, sharciga gobalka ayaa u baahan in mulkiilaha gurigaagu uu ku siiyo xog ka imaanaysa Waaxda Caafimaadka oo ku saabsan cayayaanka iyo xog ku saabsan badqabka. Dhismayaasha waawayn ee qoysaska badan degaan waa inay lahaadaan sawir muujinaaya meesha looga baxaayo marka xaalad degdeg ah timaado.

TILMAAN: Xasuusnoow inaad xariir ganacsi la leedahay mulkiilaha gurigaaga taasoo labadiinaba saamayn wayn idin kasoo gaarayo tallaabooyinka uu midka kale qaado. Raac tilmaamahaan muhiimka ah.

- Hayso dukumiintigaaga muhiimka ah sida heshiiska kirada, liiska soo guurida, iyo Buug Gacmeedkaaga Kiraystaha
- Ka dhig wada hadalka mid qeexan oo qadarin leh
- Diwaangali wadahaadalka muhiimka ah si qoraal ah



Waajibaadka Mulkiilaha guriga



- Dhawr dhismaha iyo qaybihiisa dhismaha
- Inuu sameeyo dayactirada waqtiga ku habboon
- Inuu dayactiro aaga guud sida luuqyada, jaranjarooyinka, iyo hoolalka la maro
- Inuu ka sifeeyo cayayaanka
- Inuu ku xiro qalabka qiqa iyo carbon monoxide ka sheega oo shaqaynaaya
- Inuu bixiyo qufulada iyo furayaasha amaanka gelitaanka
- Inuu bixiyo qasacyada guud ee qashinka, wax dib u sifaynta, iyo wasaqda cuntada



Waajibaadka Kiraystaha

- Ku bixi kirada waqtigeeda oo raac xeerarka heshiiska kirada
- Dhowr nadaafada iyo xanaanada guriga kirada ah
- Dhowr qalabka qiqa iyo carbon monoxide ka sheega
- Kahortag waxyaabaha sharci darada ama khatarta ah ee guriga kirada ah ka jira
- Dhowr saacadaha daganaanshaha
- Ku shaqaynta tuubooyinka, korontada, iyo nidaamka dabka si sax ah
- Meel fiican ku rid qashinka, wax dib u sifaynta, iyo wasaqda cuntada

Waa wax fiican in la ogaado!

Mulkiilaha gurigaagu waa inuu ku siiyaa qaab kale oo aad lacagta ku dhiibto haddii aadan awoodin inaad lacagta kirada ku bixiso qaab oonleen ah.

TILMAAN:

Xasuusnoow inaad hesho rasiitka kiradaada taasi waa xaquuqdaada.

Dayactirada



Heshiiskaaga kirada ah ayaa sheegaaya si qeexan cidda aad la xariirayso marka ay xaalado degdeg ah dhacaan iyo codsiyada dayactirka. Inaad si dhakhso ah u soo sheegto dayactirka loo baahna yahay in guriga lagu sameeyo waa mid muhiima maadaama adiga dusha lagaa saari karo mas'uuliyadda dhaqaale ee waxyeelada ay sababto dib u dhaca dayactirka aad soo sheegi weyday.

Sharciga gobalka ayaa qasab ka dhigaaya inaad codsiga dayactirka ku samayso si qoraal ah. Waa tallaabo wanaagsan inaad aruuriso diiwaanka codsiyada dayactirka kaasoo waajib uga dhigaaya mulkiilaha guriga inuu jawaabo. Waxaad sidoo kale wici kartaa mulkiilaha guriga haddii kaa caawinayso boobsiinta arinta, laakiin xaqiiji inaad codsiga ka dhigto mid qoraal ah.

Mulkiilaha guriga waxaa laga doonayaa inuu dayactirka bilaabo gudaha:

- 24 saacadood haddii aadan haysan biyo, koronto, ama kuleeliye inta lagu jiro jiilaalka, ama haddii ay tahay cilad nafta/badqabka dhib ku ah.
- 72 saacadood gudahood haddii aan qalabkaaga korontadu shaqaynayn ama aad qabto cilad dhanka tuubada ah oo ka jirta siinkaaga ama baafka qubayska.
- 10 maalmood gudahood codsi kasta oo kale oo dayactir

Haddii mulkiilaha gurigaagu uusan ka jawaabin ama uusan diidin inuu sameeyo dayactirka loo baahan yahay, waxaad la xiriiri kartaa Laynka Caawimaadda oo ah (206) 684-5700.

- Xaaladaha degdega ah sida biyo ama koronto la'aanta, kormeere ayaa iskudayi doona inuu kormeero gurigaaga isla maalinta ama maalinta xigta ee shaqada kadibna waxa uu degdeg ula xariiraaya mulkiilaha gurigaaga
- Cilado kale, kormeere ayaa kusoo wacaaya si uu balan kuula yeesho si loo kormeero gurigaaga haddii ay jiraan xadgudubyada guriyaynta, caadiyana shan ilaa toban maalmood gudahood
- Kormeeraha ayaa diyaarintaaya ogaysiis toos loogu diraaqo mulkiilaha guriga inuu dayactirada sameeyo.

Ayada oo ay gartahay inaad kirada diido marka uusan mulkiilaha gurigaagu ka jawaabin ama uusan samayn dayactirkii loo baahnaa, haddana ma ahan mid laguugula talinaayo. Inkastoo State's Residential Landlord Tenant Act (Sharciga Mulkiilaha iyo Kiraystaha Guryaha la degan yahay ee Gobalku) uu ka hadlaayo dayactirka iyo kaalmooyinka lacag jarashada ee kiraystayaasha, haddana waa nidaam aad qaas u ah waana khatar wayn in kirada la diido waayo mulkiilaha guriga waxa uu dooran karaa inuu guriga kaaga saaro inaad lacagta bixin wayday. Cabasho u gudbi Dowladda hoose adiga oo ka wacaya Laynka Caawimadda (206) 684-5700 lana tasho garyaqaan kahor inta aadan qaadin talaabo kasta oo xaq kuu ah taasoo khatar galin karta kiradaada

Ku darista dad Cusub qolka



Guryaha Seattle ayaa noqon kara kuwo qaali ah inaad hesho meel qiimo jaban oo aad ka degto. Waxaad guriga soo dajin karta adad kale kuwaas oo kaa caawiya haddii aad la dhibtoonayso bixinta kharashaadka guriga.

Feejignooow markaad qof cusub guriga soo dajinayso, waxay noqon kartaa wax dhib badan oo adag inaad guriga ka saarto haddii aan heshiiskiinu shaqayn. Xasuuusnoow, qof walba oo kirada bixiya wuxuu leeyahay xaquuq haddii heshiiska kirada kujiro iyo haddii kaleba.

Waxaa intaas dheer, kireysashadaada ayaa khatar geli kara haddii mulkiiluhu go'aansado inuu guriga ka saaro. Waa wax habboon inaad la shaqayso mulkiilaha gurigaaga marka aad doonayso inaad guriga qof keento.

Waxaad kusoo dari kartaa:

- Qof qoyskaaga ah
- Hal qof oo dheeraad ah oo aan qoyskaaga ahayn
- Qof qoyskaaga ah oo dheeraad ah
- Cid kasta oo guriga kula degta oo mulkiilaha gurigu aqbal
- Waa inuusan ka baxsanayn heerarka kirada sharciga ah

Qof ehelkaaga dhaw ah waa kalimad balaaran waxaana ku jira:

Xaasaska, lamaanayaasha maxaliga ah, xaasaskii hore, lamaane hore oo maxali ah, dad waawayn oo kugula xariira guur, ilmo walaalaha ah, dad jira 16 sano ama ka wayn oo hadda isla dagan ama isla daganaan jiray waagii hore lehna ama lahaa xariir jaceel, iyo shaqsiyaadka ay u dhaxeeyaan xariirka waalidka iyo ilmaha, ayna ku jiraan waalidiinta, xaaska waalidiinta, awoowe ama ayeeyo, waalidka kusoo korsaday, masuuliyiinta, waalidiinta ku koriyay, ama masuuliyiinta ilmaha yaryar.

Qeexitaankaan awgiis, "xariir shukaansi" waxaa laga wadaa xariir bulshanimoo oo nooc jaceel ah. Waxyaabaha maxkadu ay eegi karto marka ay go'aaminayso jiritaanka xariir shukaansi waxaa ku jira: (a) muddada waqtiga xariirku socday; (b) nooca xariirka; iyo (c) inta uu soconayo isdhexgalka u dhaxeeya dhinacyada.


Waxaa jira tallaabooyin muhiim ah iyo jadwal ay qasab tahay inaad raacdo si aad qof kale ku keento guriga. Waa qasab inaad u sheegto mulkiilaha gurigaaga si qoraal ah 30 maalmood gudahood markaad qofka kusoo biiriso gurigaaga. Mulkiilaha gurigaaga ayaa baari kara qofka cusub ee guriga kusoo biiray asagoo adeegsanaaya isla shuruudaha baaritaanka ee hore ee loo adeegsaday codsigaaga kirada

- Qof guriga kula dagaaya oo aan qoyskaaga ahayn (a) ayaa la baari karaa oo (b) loo diidi karaa inuu guriga kula dago ayadoo laga eegaayo baaritaanka
- Qoyskaaga kuu dhaw (a) ayaa la baari karaa iyo (b) looma diidi karo inuu kula dago. Qarashaadka baaritaanka ayaa la ogolyahay si waafaqsan *Rental Agreement Regulation Ordinance* (Xeerka Sharciga Heshiiska Kirada ah) (SMC 7.24) iyo sharciga gobalka ee mulkiilaha guriga iyo kiraystaha.
- Mulkiilaha guriga ayaa dalban kara in qofka guriga kula dagaaya uu kusoo biiro heshiiska kirada asagoo ku siinaaya ogaysiis qoraal ah oo 30 maalmood ah.
- Haddii qofka guriga kula dagaaya uusan kusoo biirin heshiiska kirada 30 maalmood gudahood, waa qasab inuu ku guuro 15 maalmood gudahood. (45 maalmood wadarta guud)
- Qoyska kuu dhaw lagama dooni karo inuu ku biiro heshiiska kirada lomana diidi karo inuu guriga kula dago.

Marka laga reebo lacagta baaritaanka, ma jiraan lacago kale oo kusoo guurida guriga oo laga qaadi karo qofka qoyskaaga kusoo kordhay. Dhammaan shuruudaha orijinaalka ah ee heshiiska kirada ayaa sidoodii ahaan doona.



Ogeysiiska ka Socda Mulkiilahaaga



Waxaa jira dhawr nooc oo ogeysiisyo ah oo aad ka heli karto mulkiilaha gurigaaga, qaarkood ayaana ka degdeg badan qaarka kale.

- U aqoonso ogaysiis kasta oo qoraal ah oo ka yimaada mulkiilaha gurigaaga mid muhiim ah oo u baahan talaabo degdeg ah. Isla markaba akhri oo qaad tallaabo degdeg ah haddii loo baahdo.
- Ogaysiisyada u baahan talaabada ayaa caadiyan ku siinaaya muddo kooban oo aad ku fuliso. Inaadan xiligii la rabay jawaab bixin ayaa keeni karta caqabado daran, sida in guriga lagaa saaro.
- Ogaysiisyada mulkiilaha guriga waa inay raacaan sharciyada Magaalada.
- Ogaysiisyada saamaynaaya xaquuqda kiraystaha sida:
 - Ogaysiisyada baabi'inaaya, ama joojinaaya, raac amarka iyo/ama guur
 - Ogaysiisyada kordhinta lacagta kirada (kirada iwm.)
- Ogaysiisyada gelitaanka waa inay ku jiraan luuqadaha soo socda:

Haddii aad u baahan tahay caawimaad lagaa siiyo fahanka ogaysiisnaan ama xog ku saabsan xaquuqaha kiraystaha, wac Laynka caawimaada ee Renting in Seattle oo ah (206) 684- 5700 ama booqo webseetka oo ah www.seattle.gov/rentinginseattle.

- Ogaysiisyada iskudayga ka bixista heshiiska kirada ah sida kan Ku bixi 14 Maalmood ama Baneer, 10 maalmood Kusoo ajiib ama Baneer iwm. waa in luuqadaha dheeraadka ah ee soo socdaa kujiraan:

XAQA LATALINTA SHARCIGA: SHURUUCDA MAGAALADU WAXAY KIRAYSTEYAASHA AAN ISKA BIXIN KARIN KHARASHKA QAREENKA SIINAYAAN XAQUUQ UU KU HELI KARO MATAAAD SHARCI OO BILAASH AH XILIGA DACWADDA GURI KA SAARISTA.



SEATTLE MUNICIPAL CODE (7.24.034)

QARASHKa ogeysiisyada iyo kirada lala soo daaho

*Ku socota: Kireysteyaasha iyo Mulkiileyaasha
Dhulka ee Magaalada Seattle*

Xeerarka cusub ee dhammaan ogeysiisyada kasoo baxa mulkiilaha guriga laga bilaabo Juun 6, 2023

Ma jiro kharash la ogol yahay in lagu qaado diyaarinta ogeysiis
Ma jiro kharash la ogol yahay in lagu qaado keenista ogeysiiska
Qarashka ganaaxa lasoo daahida kirada ayaan ka badnaan
karin \$10 bil kasta

*Si aad u hesho xog ku aadan xuquuqdaada
kireystaha, wac Renting in Seattle Helpline
(206) 684-5700 ama booqo webseedka oo ah
www.seattle.gov/rentinginseattle*

Ilaa iyo Juun, 2023 mulkiilaha dhulkaagu kuguma soo dalici karo kharashka diyaarinta ama keenista ogaysiiska kharashka soo daahintuna wuxuu ku kooban yahay \$10 bishii.

Wac Laynka Caawimaada ee Renting in Seattle oo ah (206) 684-5700 haddii aad doonayso in lagaa caawiyo helitaanka ogaysiis. Waxaad sidoo kale wici kartaa 2-1-1 si aad u hesho xog ku saabsan adeegyada sharciga oo bilaash ah ama raqiis ah. Qaybta xigtaa waxay ka hadlaysaa noocyada ugu badan ogaysiisyada.

Ogaysiiska Kor ukaca Qarashaadka Kirada

"Qarashaadka kirada" waxaa ku jira kirada iyo qarash kasta oo bile ah oo aad siiso mulkiilaha gurigaaga, sida kaydka ama baakinka. Qarashaadka adeegga guriga oo lagu saleeyay isticmaalka kuma jiraan ogaysiiska noocaan ah. Haddii aad horey u bixisay adeegyada, laakiin aad shirkad kale ku badalanayso tii hore, mulkiilaha gurigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku siiyo ogaysiis 30 maalmood ah si aad u badasho heshiiska kirada.

Haddii aad haysato kirada ee muddo gaar ah, mulkiilaha gurigu ma badeli karo qarashaadka gurigaaga inta lagu jiro. Haddii heshiiskaaga kiradu uu ku siiyo dookh aad ku joogaysa kiraystaha bilaha ah dhammaadka muddada, mulkiilaha guriguna uu doonaayo inuu kordhiyo qarashaadka kiradaada xiligaas, mulkiilaha gurigu waa inuu kuusoo diraa ogaysiiska kordhinta qarashka kirada kahor inta aan shardigu dhicin.

- Dhammaanba kororka ku yimaada kharashka guryaha waxay u baahan yihiin in ogaysiis 180 maalmood ah laga hormariyo
- Ogaysiiska waa inuu kujiraa luuqadda loobaahanyahy (ka eeg bogga 36) waxyaabaha ku saabsan xaquuqaha iyo macluumaadka kiraytaha
- Wac Khadka caawimaadda (206) 684-5700 si aad u aragto in ogaysiiska kordhinta yahay mid sax ah. Bixinta qaddarka kirada cusub waxa ay muujin kartaa inaad ogolaatay kordhinta.
- Kororka waa inuu dhacaa waqtiga billoowga kireynta. Tusaale ahaan, haddii kirada lagaa rabo 1da bisha mulkiiluhuna kusiiyo ogaysiis 180 maalmood ah 5ta Janaayo, marka ug uhoreysa kordhinta ay dhaqangaleyso waxay noqon kartaa 1da Agoosto si ay ugu ogalaato shardi ogaysiis oo dhameystiran.
- Majiro koror dhaqan galaaya haddii gurigaaga kirada ah uusan buuxin *Rental Registration and Inspection Ordinance (RRIO)*. Eeg www.seattle.gov/rrio. Waa inaad mulkiilaha dhulkaaga ogaysiisaa si qoraal ah lana xiriirtaa Khadka caawimaadda si aadu muddaysato kormeerka kahor inta kororka dhaqangalin.

Economic Displacement Relocation Assistance ordinance (EDRA)

Qoysaska dakhli ahaan u qalma kirada (oo gaar ah ama ka hooseeya 80% nidaamka sannadlaha ah ee AMI) kuwaas oo kharashaadka guryahooda la kordhiyay ilaa 10% ama ka badan sannadkii, ayaa u qalma in la siiyo kaalmada soo rarista si ay usoo dagaan

Qoyska	1	2	3	4	5	6	7	8
Dakhliga	\$70,650	\$80,750	\$90,850	\$109,000	\$117,050	\$125,150	\$133,200	\$125,800

- Qoysaska codsanaya waa inay lahaadaan ogaysiis ku saabsan kororka kharashka guriyeynta oo ku taariikhaysan Luulyo 1, 2022 (ama ka dib).
- Kordhinta 10% waxay noqon kartaa hal koror oo kaliya ama kororyo iskuxiran taas oo qaadata saameyn iskumid ah waqti 12 bilood ah.
- Kaalmada raritaanku waa ku dhawaad 3x ee kharashka kirada oo ay magaaladu u horumarisay qoysaska u qalma.
- Si aad wax badan u barato ama aad u codsato (EDRA) booqo www.seattle.gov/rentinginseattle/edra ama wac khadka caawinta haddii aadan geli karin intarneedka

Ogaysiiska Isbadelada Shuruudaha Heshiiskaaga Kirad

Haddii aad saxiixday heshiiska kirada oo wakhti cayiman ah, sidoo kalena loo yaqaano kirada, qodobada heshiisku isma badeli karaan ilaa kirada wakhtigeedu ka dhamaanayo inaad adiga iyo mulkiilaha gurigu si kale u heshiisaan maahane. Haddii aad ku jirto heshiiska kirada billaha ah, mulkiilaha guriga ayaa badali kara shuruudaha asagoo ku siinaaya ogaysiis 30 maalmood kahor biloowga xili kireedka cusub.

Isbadelada waxaa ku jiri kara xeerarka la xariira sigaarka, martida, ama xayawaanka rabaayada ah oo kamid ah tusaalaha noocyo kale oo badna. Isbadalo kasta oo kordhinaaya qarashka kiradaada waa inay waafaqaan shuruudaha ogaysiiska kordhinta kirada guriga. Arag bogga. 38.



Ogaysiiska Doonista libinta Guriga

Heshiiskaaga kirada ayaa ku siinaaya xaquuq aad ku xukunto cidda gurigaaga galaysa Taasi waxay ka dhigan tahay inaan mulkiilaha gurigu geli karin asagoo horay kuusiin ogaysiiska illaa inay jirto xaalad degdeg ah maahae. Mulkiilaha dhulku wuxuu xaq u leeyahay ogolaanshaha dayactirka, kormeerka, ama tusidda guriga dadka doonaya inay kiraystaan ama qandaraasleayaasha. Mulkiilahaagu waxa uu u baahan yahay inuu ku siiyo:

- Ugu yaraan ogaysiiska 2da maalin ah ee lagu heshiiyay ama dayactirka ama kormeerka muhiimka ah (ugu yaraan 48 saacadood)
- Ugu yaraan ogaysiiska 1ka maalin ah ee tusidda guriga (ugu yaraan 24 saacadood)

Ogaysiisyada gelitaanka waa inay ku jiraan:

- Taariikhda mulkiilaha gurigu doonaayo inuu soo galo
- Waqtiga ugu horeeya iyo kan ugu danbeeya ee uu imaan karo
- Lambarka telefoonka aad ka wici karto haddii aad u baahato inaad dib u dhigato

Haddii taariikhda iyo waqtigu aysan kuu shaqaynin aadna haysato sabab macquul ah oo aad ku diido inaad mulkiilaha ku siiso fursad uu guriga ku galo, waa inaad u keentaa waqtiyo iyo maalmo kuu shaqaynaaya. Sababaha saxda ah waxaa kamid ah inaad madal qoyskaaga ah ku qorshaysatay guriga wakhtigaas ama inaad doonayso inaad halkaas joogto xiliga xiriirka aadna u baahan tahay ogaysiis dheeraad ah si aad shaqada uga fasax qaadata.

Mulkiilaha gurigaagu wuxuu ku siin karaa Ogaysiis 10 Maalmood ah si aad ugu Hogaansanto haddii aad ku guuldaraysato inaad siiso xiriir macquul ah.

TILMAAN:

Sharciga ayaa ka doonaaya labada dhinacba inay masuuliyad muujiyaan ayna niyad sami ku dhaqmaan. Adiga iyo mulkiilaha gurigaagu waa inaad samaysaan dadaal walba oo aad ku yeelanaysaan xiriir nadiif ah, oo ixtiraam leh. Ka fakar baahiyaha qofka kale, oo hela heshiis macquul ah, ku habboon waqtiga, iyo qaab uu ku galo guriga. Xaqiiji inaad qorto isgaarsiinta aadna muujiso inaad la shaqaynayso qofka.

Marka ay jiraan xaalado degdeg ah, mulkiilaha guriga ayaa geli kara guriga kiraystaha bilaa ogaysiis. Tusaalayaasha xaalad degdeg ah waxaa ku jiri kara:


- Dilaac wayn oo ku dhaca tuubada biyaha
- Dab
- Hubinta badqabka kiraystaha ee booliska (taasoo ku waajibinaysa mulkiilaha inuu booliska u ogolaado inay guriga soo galaan)



Markii ay dayacaad jirto, mulkiilaha guriga ayaa soo geli kara haddii uu bixiyay ogaysiiska gelitaanka uusana kaa helin wax jawaab ah kadib iskudayo badan cadayna loo hayo inaad dayacday guriga.

Caddaynta xoorista guriga waxaa ku jirta labo kamid ah ama ka badan kuwa soo socda:

- Mulkiilaha gurigaagu uusan helin lacagta kirada
- Boostadaada aan cidna soo qaadin
- Adeegyada gurigaaga looga jaray lacag la'aan awgeed



Ogaysiiska Uhogaansan ama Bax (10 Maalmood)

Mulkiilaha guriga ayaa adeegsanaaya ogaysiiska 10 maalmood ah marka aad jabiso heshiiska kirada. Tusaalayaasha waxaa ku jiri kara:

- Sigaar ku cabida dhisme/guri sigaarku mamnuuc ka yahay
- Ku haysashada xayawaan rabaayad ah marka xayawaanada rabaayada ah aan la ogolayn
- Abuurista ogaysiis cod dheer inta lagu jiro saacadaha aamusnaanta



Ogaysiiska ayaa u baahan inuu si qeexan u sheego waxa aad samaysay ee jabiyay heshiiska kirada ah iyo waxa aad u baahan tahay si aad u saxdo khaladka oo ku jira ogaysiiska.

Muddada 10 maalmood ee ku dhaqanka waxaa ku jira maalmaha dhammaadka asbuuca.

- ogaysiiska 3 maalmood ah ama ka badan oo 12 billood gudahood ah waa joojinta heshiiska kirada bil-laha ah ee sababta macquulka ah leh ama waa diidmada cusboonaysiinta kiradaada.

Ogaysiiska Bixi ama Bax (14 Maalmood)

Mulkiilaha guriga ayaa u adeesanaaya ogaysiiska 14 maalmood marka kirada, lacagta adeegyada guriga, ama lacagaha hormariska ah lalaso daaho. Kuwaasi waa kaliya qarashaadka la ogol yahay in ogaysiis kaan lagusoo saaro. Waxay ku siinaysaa muddo kooban oo aad ku dhiibto lacagta lagugu leeyahay.

- Waa inaad samayso waxkasta oo aad awoodo si aad u dhiibto qarashka isla xiligaas.
- Haddii aad isleedahay ma awoodo inaad dhiibto kiradaada waqtiga lagu qabtay, waxaa badanaa ugu fiican inaad u sheegto mulkiilaha gurigaaga xili hore. Mulkiilaha gurigaaga wuxuukugula heshiin karaa qorshe lacag bixin, waxa ugu xun ee dhici karaa waa in mulkiilaha gurigaaga diido.
- Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo bixinta kiradaada, wac 2-1-1 si aad u hesho liiska khayraadka cawimaadda kirada. Ka eeg balanqaadyada bogga. 42. Haddii dhinac sadexaad ka heli karto kaalmo dhaqaale, waxay ku siin kartaa wakhti dheeraad ah.
- ogaysiis 4 maalin ah ama 14 maalmood ka badan inta lagu jiro 12 billood ayaa ah joojinta heshiiska kirada bil-laha ah ee sababta macquulka leh ama cusboonaysiin la'aanta kiradaada.

TILMAAN:

La soco taariikhda kirada lagaa rabo ee ku qoran heshiiskaaga kirada. Kirada ayaa badanaa la qaadaa maalinta koobaad ee bisha. Waa wax caadi ah inaad aragto lacagta ganaaxa lasoo daahida kirada oo lagusoo rogaayo maalinta saddexaad ama shanaad. Tani kama dhigna inaad helayso "muddada naxariista" taasoo ah fikir qaldan oo kiraystayaal badan iska dhaadhiciyeen. Waxay ka dhigan tahay inaan lagaa qaadi karin lacag dulsaar ah illaa xiligaas. Waxaad heli kartaa ogaysiis 14 maalmood ah xili uun kamid ah saqda dhexe maalinta kirada lagaa rabay Eeg kharashka soo daaha bogga. 37

Ogaysiiska ka Bixista sabab la xiriirta Qashin Qaylo ama Howlo Faldanbiyeed ah (3 Maamlmood)

Mulkiilaha guriga ayaa adeegsan doona ogaysiisnaan 3 maalmood ah markay xaalad aad u xun jirto, sida marka fal danbiyeed uu ka dhaco dhismaha ama waxyeelo daran lagu sameeyo guriga kirada ah. Daawo malahan ogaysiisnaan; sida kaliya oo aad ku waafiqi karto waa inaad ka baxdo guriga ama raadsato qareen isla markaba si uu kuugu difaaco dacwad maxkamadeed.

Mulkiilayaasha guryuhu waa inay koobiga ogaysiisyada fal danbiyeedka siiyaan Seattle Department of Construction and Inspections (Waaxda Dhismaha iyo Kormeerka ee Seattle). Waa in la hayaa cadayn buuxda si ogaysiiska noocaan ah u noqdo mid ku habboon xaaladaha jira.

Ogaysiiska Joojinta Kirada Sabab Sharci ah awgeed

Waxaa jira sababo gaar ah oo macquul ah oo mulkiilaha gurigu uu u adeegsan karo heshiiska kirada billaha ah ee gudaha Seattle. Muddada ogaysiiska ee loo baahan yahay ayaa ku xiran sababta macquulka ah.

Just Cause Eviction Ordinance ayaa looga hadlay qaybta "Guurista" ee bogga. 46.



Ogaysiiska Doonista Iibinta Guriga

Mulkiilayaasha hantida guryaha leh labo guri ama wixi ka badan oo kiro ah ama leh wax kayar hal guri oo kiro ah 80% AMI (Dakhliga Dhexe ee celceliska ah) waa inay ogeysiyaan Seattle Office of Housing rabitaankooda ah iney iibiyaan ugu yaraan 90 beri kahor inta aan dhismaha lagu darin liiska iibinta.

Magaalada iyadoo kaashaneysa Seattle Housing Authority iyo bixiyayaasha bulshada, waxay isticmaali karaan ogeysiinta macluumaadka si ay uqiimeeyaan guryaha una geeyaan dhowr qalab oo lagu xanaaneeyo, oo ay kujiraan dhiirgalinta iyo helidda.

Tani waxay sidoo kale siinaysaa ogeysiis kiraystayaasha laga yaabo inay saameyn ku yeelato iska iibinta.

Booqo www.seattle.gov/housing/intent-to-sell si aad wax badan u ogaato.

Balanqaadyada Caawimaada Kirada

Haddii aad la daahday kirada aadna heshay ogaysiis 14 maalmood ah oo aad ku dhiibayso ama kaga guurayso guriga, mulkiilaha gurigaagu waa inuu aqbalaan balanqaadka qoran ee bixinta lacagta oo uu samaynaayo qof kale. Qolada saddexaad ayaa noqon karta kaniisad ama urur khayri ah.

- Balanqaadku waa inuu noqdaa mid qoraal ah
- Balanqaadka waa in la helaa kahor iinta ogaysiiska 14 maalmood ah uusan dhicin
- Cidda lacagta dhiibaysa waa inay dhab katahay bixinta lacagta ay balan qaadeen muddo 5 maalmood ah gudahood.
- Ishu waa inaysan mulkiilaha guriga ku waajabinayn wax aan ka ahayn bixinta macluumaadka lacag bixinta
- Lacagtu waa inay noqoto mid ku filan inay kuu ogolaato inaad iska bixiso dhammaan qarashaadka si iskeed ah ama iskudarka ilaha kale ee dakhliga ama kaalmooyinka

Waa wax fiican in la ogaado!

Waxaa jira sharciyada gobalka oo dheeraad ah oo qasab uga dhigaaya mulkiilayaasha guriga inay aqbalaan balanqaadka caawimaada xataa haddii ogaysiiska 14 maalmood ah dhaco illaa nidaamka guri kasaarida ee maxkamada. Difaacyadaan ma fulinayso Magaaladu. (Arag Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Dib loo eegay ee Washington) 59.18.410)

Difaaca Dhibanaha Rabshada Qoyska

- Kiraystayaasha waajahaaya rabshada qoyska looma qabsan karo waxyeelada ku dhacda guriga ay degan yihiin ee uu sababay qofka xadgudubka gaystay
- Kiraystuhu waa inuu u keenaa dukumiintiyada mulkiilaha guriga in ayaga ama qof guriga dagan uu yahay dhibanaha rabshada qoyska iyo xadgudbaha gaystay waxyeelada.
- Qorista dukumiintiga waa inay saxiixdaa qayb 3aad oo ka socda Waaxda Booliska Seattle, xirfadle caafimaadka dhimirka ah oo Shati haysta, qareen qaabilsan arrimaha xadgudubka qoyska, wadaad, maamule kiisaska bulshada qaabilsan.



KAGUURIDA GURIGGA

Inta badan heshiisyada kiradu waxay sheegi doonaan sida ay qasabka u tahay inaad ogaysiis siiso mulkiilaha guriga marka aad doonayso inaad guurto Haddii aad tahay kirayste bil-le ah, waxaa lagaaga baahan yahay inaad mulkiilaha gurigaaga u sheegto si qoraal ah ugu yaraan 20 maalmood inta aysan bishu dhammaan inaad guurayso. Tusaale ahaan, haddii aad doonayso inaad guurto Luuliyo 31, mulkiilaha guriga aad dagan tahay waa inuu helaa ogaysiiskaaga ugu danbayn Luuliyo 11.

Xasuusnoow haddii aadan keenin ogaysiis sax ah, waxaad masuul ka noqon kartaa kirada bisha soo socota.







Haddii mulkiilaha gurigaagu uu si lama filaan kuugusoo saaro ogaysiis uu kusoo afjaraayo heshiiskaaga kirada, isla markaba akhri ogaysiiska. Ogaysiisyada lagu bixiyo Magaalada Seattle waa inay raacaan sharciyada Magaalada. Si lagaaga caawiyo dib u eegista wicitaanka ogaysiiskaaga wac Khadka caawimaadda (206) 684-5700.

- Haddii aad tahay kirayste bile ah ama aad leedahay heshiiska kirada oo si ootomaatig ah iskugu badelaaya mid bile ah mulkiilaha gurigaagu waa inuu keenaa sabab sharci ah oo uu kusoo afjaraayo heshiiska kiradaada.
- Haddii aad haysato heshiiska joojinta kirada, mulkiilaha gurigu waa inuu kuu sameeyaa cusboonaysiin macquul ah oo 60-90 maalmood ah kahor inta uusan dhammaan wakhtiga heshiisku ama waa inuu ku siiyaa just cause si uusan kuugu cusboonaysiin.

Waa wax fiican in la ogaado!

mulkiileyaasha guryaha ee guryaha la wadaaga ama guriga kula nool kiraysteyaashooda waxay haystaan just cause si ay ugu joojiyaan kirada bil-laha ah ogaysiiska 20 maalmood ah waxayna diidi karaan inay soo cusboonaysiiyaan kirada marka wakhtigeedu dhammaado.

Just Cause Eviction Ordinance

Just Cause Eviction Ordinance ee Seattle wuxuu ka hortagaa eryida kiraystaha. Waxay ka doonaysaa mulkiilayaasha guriyaha inay lahaadaan sabab sharci ah *sabab dhab ah* haddii ay doonayaan inay soo afjaraan heshiiskaaga kirada billaha ah ama laguu diido inaad cusbooneysiiso heshiiskaaga kireynta. Mulkiilaha gurigaagu waa inuu kusiiyaa ogaysiis qoran oo caadiyan loo yaqaano *Notice to Terminate Tenancy (Ogaysiiska Joojinta Heshiiska Kirada)* uuna sheegaa sababta sharciga gaarka ah. Cadadka heshiiska hordhaca ah ayaa ku xiran sababta gaarka ah ee keentay. Ilaa in la sheego maahee, ogaysiis ugu yaraan 20 maalmood kahor intaan muddada kiradu dhammaan ah ayaa qasab ah. Kuwaani waa sababaha kaliga ah ee just cause uu mulkiilaha gurigaagu ku joojin karo heshiiskaaga kirada ee billaha ah.

- Kiro daahday: waxaad helayaa ogaysiiska 14 maalmood ee bixi kirada ama guur iyo ku fashilanka ku dhaqanka xeerka.
- Fashilka joogtada ah ee ku aadan bixinta kirada xiliga ku haboon. Aad hesho ogaysiisyada guur ama kirada dhiib ee 14 maalmood ah 4 jeer ama ka badan muddada kirada 12 bilood ah kadib markaad kirada la daahday.
- Jabinta heshiiskaaga kirada: Inaad heshay ogaysiiska 10 maalmood ee ku dhaqanka xeerarka heshiiskaaga kirada ama guur iyo inaad ku fashilantay ku dhaqanka heshiiska.

- Ku fashilmida joojtada ah ee ku dhaqanka heshiiskaaga kirada. Waxaad heshay ogaysiisyada tiro 3 jeer ama ka badan ee 10 maalmood ee ku dhaqanka ama ka guurista guriga 12 billood ee ugu danbeeyay kadib markaad ku fashilantay ku dhaqanka xeerarka heshiiskaaga kirada.
- Mulkiilaha gurigaaga ama xubin kamid ah qoyskaaga ayaa doonaaya inuu usoo guuro gurigaaga. Tallaabadaan ayaa u baahan ogaysiiska 90 maalmood ah. Mulkiilaha gurigaaga waxay Magaaladu ka doonaysaa inuu cadeeyo (uu saxiixo bayaan dhaar ah) haddii uu isticmaalayo just cause kaan aadna ka shakisan tahay inuusan dagayn gurigaaga ama uusan qof qoyska ah oo u qalma soo dajinayn marka aad ka guurto.
- Mulkiilaha gurigaaga ayaa doonaaya inuu gado dhismaha aad kiraysatay. Tani waxay u baahan tahay ogaysiiska 90 maalmood waxayna kaliya qusaysaa guryaha halka qoys degan yihiin, ee lagu qeexay xeerka Magaalada oo ah nidaamka guryaha isasaaraka ah. Haddii aad degan tahay guri-gaari ah, dhisme dabaq ku yaala, guri laba qaybood ah, guri saddex qaybood ah, ama guri filo ah, mulkiilaha gurigaagu ma adeegsan karo talaabadaan oo ah sabab sharci ah oo uu kusoo afjaro heshiiskaaga kirada.
- Daganaanshahaaga guri waxay ku xiran tahay inaad ka shaqayso dhismaha aadna shaqadaadana la joojiyay. Arintaan ayaa caadiyan qabanaysa maamulayaasha guryaha ee ku nool goobta.
- Mulkiilaha gurigaagu uu kiraysto qayb kamid ah gurigaaga ama qayb guri ah oo uu asagu dagaayo uusana doonayn inuu kula wadaago.
- Mulkiilaha gurigaagu uu doonaayo inuu si wayn dib ugu naqshadeeyo gurigaaga ama dhismaha aad ku nooshahay si rasmiyana kuu barakicinaayo. Tani waxay u baahan tahay in mulkiiluhu ka codsado Magaalada ruqsada guri ka guurista taasoo qaadanaysa 6 bilood. Shuruudaha ruqsada waxaa kamid ah inuu ku siiyo baakada xogta iyo inuu bixiyo qarashka caawimaada guuristaada haddii dakhligaagu ka hooseeyo 50% dakhliga dhexe ee King County.
- Mulkiilaha gurigaagu uu doonaayo inuu dhismaha aad dagan tahay dumiyo ama u badelo inuu u adeegsado wax aan ahayn kiro. Tani waxay u baahan tahay ruqsada guurista si lamid ah mida barakicinta dib u naqshadaynta guriga. Kor fiiri.
- Mulkiilaha gurigaagu uu doonaayo inuu dhismaha u adeegsado wax aan ahayn kiro. Tani waxay u baahan tahay ruqsada guurista si lamid ah mida barakicinta dib u naqshadaynta guriga. Kor fiiri.

- Mulkiilaha gurigaaga ayaa doonaaya inuu guriga aad degan tahay u badalo dabaq ama guryo iskaashato. Badalladaan ayaa u baahan habraacooda gaarka ah sida ku cad *Condominium Conversion Ordinance and Co-operative Conversion Ordinance (Xeerka Badelka Guryaha Dabaqa ku yaala iyo Xeerka Badelka Guryaha Wadaaga ah)* SMC 22.903.030 iyo SMC 22.903.035
- Mulkiilaha gurigaaga ayaa helaaya ogaysiiska jabinta xeerarka guriyaynta ee guri loo oggolaaday in la dago wuxuuna doonaaya inuu joojiyo kiradaada. Mulkiilaha gurigu waa inuu bixiyaa qarashka caawimaada guuristaada oo dhan \$2,000 ama u dhigantas' kirada 2 billood labo asbuuc kahor intaadan guurin.
- Mulkiilaha gurigaaga ayaa helaaya ogaysiiska jabinta sabab la xariirta inuu haysto guri aan ogolaansho haysan, kaasoo badanaa loogu yeero "guri sharci daro ah," waana qasab inuu soo afjaraa kiradaada guriga. Mulkiilaha gurigu waa inuu bixiyaa qarashka caawimaada guuristaada oo ah midkood \$2,000 ama u dhiganta kirada 2 billood 2 asbuuc kahor intaadan guurin.
- Mulkiilaha gurigaagu waa inuu yareeyaa tirada dadka dagan guriga si uu u raaco xadiga sharcigu dajiyay. Tani ayaa u baahan ogaysiiska 30 maalmood ah iyo dhiibista qarashka guuristaada oo dhan \$2,000 ama u dhigma lacagta kirada 2 billood kahor 2 asbuuc intaadan guurin.
- Mulkiilaha gurigaaga ayaa loosoo saaray amarka xaalada degdega ah ee Magaalada oo ah in laga guuro lana xiro guriga aad dagan tahay sabab la xariirta xaaladaha caafimaadka oo khatar ah. Shuruudaha ogaysiiska ayaa ku xiran xaaladaha gaarka ah ee xaalada degdega ah, laakiin markasta waa muddo aad u kooban. Waxaad heli kartaa kaalmo dib u dajin ah haddii xaaladda degdega ah la ogaado inuu mulkiilaha gurigu mas'uul ka yahay. Qarashka caawimaada guurista ayaa la waafajiyaa qiimaha nolosha ee sanad kasta.
- Mulkiilaha gurigaaga ayaa kuusoo saaraaya *Day Notice to Quit (Ogaysiiska 3 Maalin ee ka Bixida guriga)* kadib markii aad fal danbi ah ku samaysay dhismaha. Mulkiilaha gurigu waa inuu sheegaa danbiga iyo xaqiiqooyinka taageeraaya eedaynta ku qoran ogaysiiska joojinta heshiiska kirada uuna koobiga ogaysiiska siiyaa Magaalada.

Waa wax fiican in la ogaado!

Xaquuqahaaga sababta sharciga ah lama jabin karo. Heshiis kasta oo kiro oo iskudaya inuu sidaan yeelo lama fulin doono.

Waa xadgudub ka dhan ah *Just Cause Eviction Ordinance* in mulkiiluhu uu ku tiirsanaado sababta macquulka ah si uu baabi'yo heshiiska kirada uuna ku fashilmo inuu raaco habraaca, haddii ay taasi ka dhigantahay inaad dhismaha kusoo guurin, inuusan ku darin liiska iibka, iwm. Lacago ganaax iyo ciqaab ah ayaa lagaa qaadayaa, kiraystayaashuna waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan magdhawga waxyeelada oo dhan \$2,000 oo u gudbin karaan Maxkamada Sheegashooyinka Yaryar.

Ogaysiiska joojinta kirada waa inay kujirtaa luuqad gaar ah (eeg bogga. 36) iyo macluumaadka. Haddii aad hesho ogaysiis, la xariira Laynka caawimaada ee Renting in Seattle (Guri Ka kiraysiga gudaha Seattle) oo ah (206) 684-5700 si ay kaaga caawiso go'aaminta in ogaysiisku yahay mid sax ah.

Difaaca kaaga filan in guriga lagaa saaro

Kasaarida Gurigga xiliga Jiilaalka

Xeerka difaaca guri ka saarista xiliga qaboobaha ayaa jira si uu kiraysteyaasha nugal ee Seattle uga ilaaliyo inay hoy la'aan noqdaan inta lagu jiro bilaha aadka u qabow. Diisambar 1deeda iyo Maarso 1deeda qoysaska dakhligoodu dhexdhexaadka yahay ayaa ku tiirsanaan kara in guri looga saaro sababaha soo socda:

- Mulkiilaha gurigu inuu leeyahay wax kayar afar guri oo kiro ah gudaha Magaalada Seattle.
- Mulkiilaha ama xubin ka socda qoyskiisu uu doonaayo inuu dago guriga kirada ah
- Mulkiiluhu inuu doonaayo inuu iibiyo guriga kirada ah
- Magaaladu waxay mulkiilaha k adoonaysaa inuu joojiyo kiraysiga guriga (sababo badan owgood). Xaaladaha qaarkood, kiraystayaasha barokacay ayaa la siiyaa kaalmo raritaan
- Mulkiiluhu wuxuu soo saari karaa ogaysiiska ku Guurista 3 Maalmood howlo faldanbiyeed dartood, qashin/wasakh ama in ammaankiisa iyo caafimaadkiisa khatar la galiyay asaga oo waraaq u diraya Magaalada.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo kirada ama guuritaanka wac 2-1-1 si aad u hesho liiska gudbinta oo balaaran laguuna gudbinaayo wakaaladaha bixiya maal gelinta iyo khayraadka kale.

Ka saarida Sannad Dugsiyeedka

Hadii qoyskaada leeyahay arday (xanaano maalmeedka- dugsiya sare), barayaasha ama kaalmada shaqaalaha waxbarashada, waxa laga yaabaa inaad tan usoo qaaddo difaac ahaan in guriga laga saaro inta lagu guda jiro Sannad Dugsiyeedka kalandarka Seattle. Waxyaabaha ka reeban ee soo socda ayaa khuseeya:

- Mulkiilaha ama qoyskiisa soke uu doonaayo inuu dago guriga kirada ah
- Magaalada waxay uga baahan tahy mulkiilaha inuu sii wadin kireynta guriga sababo kala duwan awgood (kiisaska qaar kireystayaasha lasoo buriyey waxaa lasiiyaa kaalmo dib udajinneed)
- Magaalada waxay uga baahantahy mulkiilaha inuu yareeyo tirada kireystayaasha guriga.
- Mulkiilaha ayaa soo saaraya ogeysiiska uga Bixitaan 3 Maalin ah oo ku saabsan fal dambiyeed, qas/qashin ama wax khatar ku ah caafimaadka iyo badbaadada

Dhibaataada dhaqaale ee la xiriirta caabuqa Covid-19

* La kulmay inti lagu jiray xilliga Gurmadka Madaniga ah

Difaacyada Kale ee Kasaarida Gurigga

Kajira xeerka Magaalada sida caadiga ah sababtuna tahay qaar kamid ah ku guuldareysiga mulkiilaha, sida kuguuldaraysiga diiwaangelinta kireynta guriga, ama kuguuldaraysiga caddaynta joojinta sabab dhab ah, tusaale ahaan





Guri kuhaysiga sifo sharci daro ah

Guri ka saarid, ama xanibid sharci daro ah, waa nidaam sharci oo mulkiilaha gurigu ku qasban yahay inuu raaco si uu maxkamad uga codsado inay usoo celiso mulkiyada guri kiro looga dagan yahay. Waa sharci daro in mulkiiluhu iskudayo inuu qofka ka saaro guriga asagoon marin nidaamka xanibaada sharci darada ah. Tallaabooyinka sida badelka qufulada, meesha ka saarida agabka kiraystaha ama jarista korontada iyo biyaha ayaa dhammaan mamnuuc ah.

Kahor intaan shaqada maxkamadu bilaaban, mulkiilaha gurigu waa inuu marka koobaad ku siiyaa ogaysiis. Ogaysiiska ayaa iskudayi kara inuu soo afjaro heshiiskaaga kirada sabab macquul ah awgeed, in lagaa qaado kiro aad la daahday, ama uu fuliyo xeerarka heshiiska kiradaada. Ka eeg noocyada ogaysiisyada bogga 36. Haddii aad ku fashilanto inaad raacdo ogaysiiska saxda ah, mulkiilaha guriga ayaa intaas kadib sii wadi kara dacwad maxbuus oo sharci darro ah kaas oo waydiisanaya maxkamada inay guriga kirada u soo celiso mulkiilaha.

Mulkiiluhu waa inuu iskudayaa inuu ku siiyo dukumiinti maxkamadeed oo layiraahdo maxkamad u yeeris iyo dacwad kuwaas oo sharaxaya sababta dhabta ah ama sababaha ay kudoonayaan inay kaa saaraan guriga Badanaa waxaa lagugu weydiin doonaa kharashaad sharci oo ay dheer tahay amarka ka saarida guriga.

Aad ayay muhiim u tahay inaad talo ka doonato qareen xirfad u leh islamarkaba marka aad hesho dacwad ugu yeerida iyo cabshada. Dukumiintiga waxaa ku qornaan doonta waqti cayiman oo aad uga jawaabayso. Haddii aadan jawaabin muddada la cayimay, isla markaba waa lagaa saari karaa guriga.

Magaaladu waxa ay iskaashi la leedahay Housing Justice Project (Mashruuca Caddaaladda Guriyeynta) si ay u siiso xaq latalinta qoyska kasta oo uu guri u kireysnaa oo laga saaray ee aan awoodi karin inuu qareen qabsado.

Si aad u hesho xaqda latalinta, waxaad HJP kula xidhiidhi kartaa afar siyaabood oo kala duwan: Foom oonleen ah ka buuxi www.kcba.org si aad u codsato in lagaa caawiyo sharciga. Wac (206) 580-0762 si aad farriin u reebto. limayl udhir hjpestaff@kcba.org Bookho barta sharci yaqaanada M-F, 9subaxnimo-12duhurnimo oo ku taala King County Courthouse ee Seattle.

Soo celinta Carbuuntaada Damaanada ah

Marka aad guurto, waa inaad soo gudbisaa guriga aad kirada ku daganayd oo ah isla xaaladii aad ku kiraysatay marka laga reebo murmuruxa iyo jeexmida caadiga ah. Murmuruxa iyo jeexmida caadiga ah ayaa dabiiciyan dhaca muddo kadib ayagoo ka dhasha isticmaalka caadiga ah. Tusaalayaasha waxaa ku jira baaba'a riinjiga, nabarada shumaca, meelaha uu roogu ka jeexmo, iwm. Waxyeelada, marka dhanka kale laga eego, ayaa caadiyan dhacda si degdeg ah kana dhalata dayacaad, isticmaal qaldan, ama si kama' ah. Tusaalayaasha waxaa kamid ah duleelada darbiga, daaqadaha jajaban, ama meelo la gubay dusha saxgaxda.

Mulkiilaha gurigaagu waa qasab inuu adeegsado liiska aad labadiinuba saxiixdeen markii aad guriga soo galaysay si uu u go'aansho haddii aad masuul ka tahay waxyeelada gaartay guriga. Mulkiilaha guriga waajib kuma ahan inuu kula diyaariyo guuristaada, laakiin waad ka codsan kartaa hadday wax kuu tarayso. Mar kasta waa fikir wanaagsan inaad sawiro ka qaadato guriga si aad u qorto xaalada aad guriga ku celisay, ayna ku jirto nadaafadu. Haddii mulkiilaha gurigaagu kaa qaado lacagta nadiifinta marka aad soo guurto, lagaama qaadi karo qarashka nadiifinta marka aad guurayso. Haddii lagugu leeyahay lacagaha adeegyada guriga, lacagta damaanada lagaaga hayay ayaa loo adeegsan doonaa in lagu daboolo.

1. Mulkiilaha gurigaagu waxa uu haystaa 30 maalmood laga bilaabo maalintaad guurtay inuu kusoo cesho lacagtaada damaanada ah iyo/ama uu ku siiyaa bayaan caddaynaayay aasaaska uu u cuskaday haysashada qayb kamid ah lacagtaada damaanada ah. Xaqiiji inaad celiso dhammaan furayaasha si aad qaab qeexan ugu muujiso inaad soo wareejinayso mulkiiyada furayaasha guriga.
2. Haddii mulkiilaha gurigu u baahan yahay waqti dheeraad ah si uu kuugusoo gudbiyo liiska qarashka dayactirka ama biilka kama danbaysta ah ee adeegyada gurigu ay soo galaan, waa inuu kuu sheegaa muddada 30 maalmood ah gudahood.
3. Mulkiilaha gurigaagu waa inuu ka fakaraa qiimaha hoos u dhacaaya ee dhismaha marka uu xisaabinaayo lacagaha lagaaga jaranaayo waxyeelada. Tusaale, da'da, xaalada iyo muddada uu shaqaynaayay ee saxgaxda guriga, agabka korontada iwm. waa in lagu daraa qiimeynta qarashaadka waxyeelada.
4. Waa masuuliyad adigga ku saaran inaad mulkiilaha guriga u keento ciwaanka boostada saxda ah si lacagtaada damaanada laguugusoo diro. Haddii aadan keenin, mulkiilaha gurigu waa inuu isticmaalaa ciwaankaaga boostada ee ugu danbeeyay.



Fikradaha kama Danbaysta ah

Guryaheena ayaa muhiim u ah dareenkeena ammaanka iyo tayada nolosheena. Sharciyada iyo xeerarka guriyeynta cadaalada ah ayaa jira si loo difaaco xaquuqdaada bii'o amaan iyo caafimaad leh oo aad xaq u leedahay inaad si dagan ugu raaxaysato gurigaaga.

Inaad xariir wanaagsan oo ganacsi lalahaato mulkiilaha gurigaaga ayaa qayb wayn ku leh daganaanshaha heshiiskaaga kirada. Mararka qaar marka iskudhac yimaado, waxaa jirta sabab aad macluumaad u raadsanayso, hagitaan iyo xataa soo dhexgalid. Laynka caawimaada Renting in Seattle (206) 684-5700 ayaa ah ishaada muhiimka ah ee caawimaada haddii aad raadinayso xogta ama aad diyaar u tahay inaad cabasho soo gudbiso.

Magaalada ayaa difaacaysa awoodaada ku dhaqanka xaquuqdaada ka kirayste ahaan. Mulkiilaha gurigaagu kaama hor istaagi karo inaad la xariirto aadna aruuriso dadka kale ee guriga kirada ku dagan, qaybinta waraaqaha xogta ama qabashada shirarka. In mulkiilaha gurigaagu kaa aargoosto inaad xaquuqdaada adeegsatay waa mid mamnuuc ah waxaana ka dhalan kara ganaaxyo, ciqaabo iyo/ama baaritaan.

Waxaan filaynaa in Buug Gacmeedkaan kiraystuhu uu noqdo aalad tixraac oo muhiim ah. In lagaaga waramo xaquuqdaada iyo waajibaadkaaga ayaa muhiim u ah guul aad ka gaarto khibradaada kiraysiga guriga. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay guri farxad iyo caafimaad leh.



Ilaha Kiraystaha

2-1-1

Ilaha nadiifinta guriga si loo helo macluumaad dhammaystiran iyo siinta kaalmo dhaqaale, caawimaad dhanka sharciga ah, iyo u qareemid dhanka guryaha ah ee King County.

Be:Seattle

Waxay siisaa kiraystaha diyaargarow dhammaystiran oo dhinac walba ah.

<https://beseattle.org>

206-487-4060

Housing Justice Project King County Bar Association (Mashruuca Cadaalad Guryaha ee Ururka Bar ee Ismaamulka King)

Wuxuu matalaad dhanka sharciga ah siiyaa kiraysteyaasha dan-yarta ah ee wajahaya guri ka saarista. 516 Third Ave Suite W-314, Seattle, WA 98104

<https://housingjusticeproject.org>

206-580-0762

Interim Community Development Association (Ururka Kumeelgaarka ah ee Horumarinta Bulshada)

Wuxuu siiyaa kahortagista guri ka saarista iyo adeegyada guryaha bulshooyinka Aasiyaanka ah, kuwa Pacific-Islanders ah, kuwa qaxootida iyo soogalootida ah.

601 S King St, Seattle, WA 98104

<https://interimcda.org/>

206-623-5132

Queer Power Alliance

Sare u qaadidda helitaanka guryaha cadaaladda ah loona simanyahay ee bulshooyinka LGBTQIA ah. Waxay bixisaa tababaro iyo kaalmo waxbarasho oo kiraystaha la siinayo.

<https://queerpoweralliance.org/>

1200 12th Ave S Suite 1101, Seattle, WA 98144

206-395-6658

Solid Ground

Solid Ground waxay ka shaqaysaa sidii dadku ay guryaha ay hadda degenyihiin u daganaan lahaayeen ayada oo adeegsanaysa macluumaad, u qareemid, maaraynta kiisaska iyo kaalmo dhaqaale oo kooban.

1501 N 45th Street, Seattle, WA 98103

<https://interimcda.org/>

206-694-6700



Somali Community Services of Seattle(Adeegyada Bulshada Soomaalida ah ee dagan Seattle)

Waa urur aan faa'iido doon ahayn kaasoo ka shaqeeya sidii loo horumarin lahaa tayada noloshu qoysaska dan-yarta ah iyo xubnaha qaxootida Soomaalida ah iyo bulshada soogalootiga ah.

8810 Renton Ave S, Seattle, WA 98118

<https://www.somcss.org/>

206-760-1181



Tenant Law Center Catholic Community Services of Western Washington

Wuxuu adeeg dhanka sharciga ah siiyaa kiraysteayaasha dan-yarta ah ee wajahaya guri ka saarista, u baahan in laga kabo guri ka saarista una baahan codsiga hoyga macquulka ah.

100 23rd Ave S, Seattle, WA 98144

<https://ccsww.org/get-help/specialized-services/tenant-law-center/>

206-580-0762

Tenants Union of Washington

Wuxuu bixiyaa adeegyada la talinta kirada, u qareemidda siyaasadeed iyo kaalmada ururka kirada.

5425 Rainier Ave S, Suite B, Seattle, WA 98118

<https://tenantsunion.org/>

206-723-0500

United Indians of All Tribes Foundation (Mu'asasada Hindida iyo Qabailka oo Dhan Homeless Prevention Program(Barnaamijka Kahortagga Hoy la'aanta)

Bixiyaha adeegyada bulshada, xarumaha bulshada, iyo hoyga dhaqanka ee Hindida magaaloyinka waaweyn degen.

5011 Bernie Whitebear Way, Seattle, WA 98199 (Discovery Park)

<https://unitedindians.org>

206 285 4425

Villa Comunitaria

Waxay soogalootida Latin ka caawisaa sidii ay uga gudbi lahaayeen culayska waaxda socdaalka Maraykanka, guryaha, caafimaadka, waxbarashada, iyo nidaamka sharciga ah si ay u bararaan oo u barwaaqoobaan.

8201 10th Ave South, Suite 8, Seattle, WA 98108

<https://villacomunitaria.org>

206-767-7445

Washington Law Help

Waxay bixisaa macluumaad sharci oo bilaash ah waxayna kaa caawinaysaa foomamka maxkamadaha oo ay kuu qorayaan qareeno si ay kuu hagaan inta aad kujirto hanaanka maxkamadaha ee guri ka saarista iyo muranada la xiriira carbuunta damaanadda ah

<https://interimcda.org/>

Tusmada



A

Aagaga guud 32 **Adeegyada 26–29** **Agabka qiiqa Sheega**

Wajibbaadka Mulkiilaha dhulka/
Kiraystaha 32
Heerarka Ugu hooseeya 9

B

Baaritaanka

Keenista dad cusub oo Qolka kula daga
34 Qarashaadka 24
First in Time 16
Haynta Carbuunta 18
Warbixinta 11–14

Barakaca 38,47

Biilasha Dhinaca Sadexaad 27–28

C

Carbuunta Damaanada ah

Haynta Carbuunta 18
Qarashaadka Sida yaryar Loo Dhiibo 25
Qarashaadka soo Guurista 24
Celinta 51
Liiska hubinta usoo Guurida guriga 21

Cayayaanka 32

Codsiga

Fair Chance Housing 12
First in Time 16

U diyaar Garoowga Kirada 14
Damaanada haynta Carbuunta 18
Saami isu dhiganka Kirada iyo
Dakhliga 17
Xayeysiinta Guryaha kirada ah 11
Xayawaanka Dadka u adeega 19

D

Dagista guriga

Keenista dad cusub oo Qolka kula
daga 34–35
Heerarka Ugu hooseeya 10

Damaanada xayawaanka rabaayada ah 24–25

Dayactirada

Wajibbaadka Mulkiilaha dhulka/
Kiraystaha 32
Ogaysiiska Gelitaanka 38

Difaaca dabka 9

Difaacyada Isha dakhliga 12

Diwaan Gelinta Kirada

Shuruudaha 10

G

Guriyayn Cadaalad ah

Takoorka 11
Xayawaanka Dadka u adeega 19

Guryaha Qiimaha jaban 6

H

Haynta Carbuunta 18
Heerarka Ugu hooseeya 8–9
Helitaanka 18
Heshiis Bille ah

Guri ka saarida sababta macquulka ah 46–49

Ka guurista 44

Ogeysiiska Mulkiilahaaga 37–41

Noocyada Heshiiska ee Kirada 23

Heshiiska Kirada ah

First in Time 16

Haynta Carbuunta 18

Sabab Darteed 46–49

Waajibaadka Mulkiilaha dhulka/
Kiraystaha 32–34

Soo dagista 21

Ogeysiiska Mulkiilahaaga Guriga 37–41

Noocyada 23–24

Qafaalashada Sharci darrada ah 50

Biilka adeegga guriga 26–27

Hooyga Macquulka ah

Helitaanka 18

Xayaysiinta Guryaha kirada ah 11

Xayawaanka Dadka u adeega 19

Hormarka

Housing Choice Voucher

Takoorka 11

Seattle Housing Authority 6

Difaacyada isha dakhliga 12

Hubinta Shaqsiyada

Fair Chance Housing 12

Warbixinta baaritaanka 14, 24

I

**Isku fiirinta Dakhliga iyo
Kirada**

Xisaabinta 17

Difaacyada isha dakhliga 12

K

Kasaarida Gurigga

Sabab Darteed 41, 46–49

Guri Ka saarida Qofka Sifo Sharci daro ah 50

Difaaca 49

Kirada - Eeg Heshiiska Kirada

Kor ukaca Qarashaadka

Kirada 37, 38

L

Liiska Hubinta

Soocelinta Carbuunta 51

Kusoo guurista 21

N

Naafada

Helitaanka 18

Xayawaanka Dadka u adeega 19

Difaacyada isha dakhliga 11–12

Nadiifinta

Soocelinta Carbuunta 51

Qarashaadka soo Guurista 24

O

Ogeysiiska

Isbadelada Shuruudaha Heshiiskaaga Kirada 38

Uhoggaansan ama Guur 40

Kharashka 36

Kor ukaca Qarashaadka Kirada 37

Ujeedada in la galo 38

Ujeedada in la iibiyo 41

Ogaysiiska Joojinta Kirada 46

Bixi ama Guur 40, 42

Joojinta Wasakh ama Qaylo 41

Joojinta Kirada Sabab Macquul ah
awgeed 41

P**Puget Sound Energy 27****Q****Qalabka Sheega Hawada
Sunta ah ee Kaarboon
Mono-oksaydhka**

Waajibaadka Mulkiilaha dhulka/

Kiraystaha 32

Heerarka Ugu hooseeya 9

Qarashaadka

First in Time 16

Qarashka lasoo daahida 28, 40

Kusoo guurista 24–25

Kharashka ogaysiiska 37

**Qarashaadka Sida yaryar
Loo Dhiibo 25****Qarashaadka soo Guurista**

Keenista dad cusub oo Qolka kula

daga 34

Qarashaadka Sida yaryar Loo Dhiibo 25

Xadidaada 24

Qashinka

Biilasha 26–29

Waajibaadka Mulkiilaha dhulka/

Kiraystaha 32

R**Riinjiga Lead-ka ka
samaysan 9****Risiidka**

Haynta Carbuunta si Soo dagista loo

Hubiyo 18

Waajibaadka Mulkiilaha dhulka/

Kiraystaha 32

Balanqaadyada Kaalmada Kirada 43

Barakaca dhaqaale 37

Kororka 37

Lacag bixinta 32

Risiidka 32

Ka haynta 33

S**Seattle City Light 26
Seattle Housing Authority**

Guryaha Qiimaha jaban 6

Gurigu Ma diiwaangashan yahay? 10

**Sharciga Ilaalinta Guryaha-
iyo Dhismaha 8****Shirkadaha Adeegyada
Guryaha Dadweynaha
ee Seattle 26****T****Taariikhda danbiyada 12, 13
Talaalo adag 14****W****Waajibaadka Mulkiilaha
guriga 32****X****Xaquuqaha**
Nidaaminta kiraystaha 52
Latalinta Sharciga 36**Xayawaanka Dadka
u adeega 19****Xayaysiinta 13**

KHADKA CAAWIMAADA: (206) 684-5700
www.seattle.gov/rentinginseattle

